aayaadka Eebe Qiimo Yar, kuwaas waxaa u Sugnaaday Ajirgooda Eebahood Agtiis, Eebana waa Deg degtaa Xisaabtiisu.

لِلَّهِ لَا يَشْتَرُونَ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ ثَمَنًا قَلِيلًا ۗ
أُو۟لَٰٓئِكَ لَهُمْ أَجْرُهُمْ عِندَ رَبِّهِمْ ۗ إِنَّ
ٱللَّهَ سَرِيعُ ٱلْحِسَابِ ﴿١٩٩﴾

200. Kuwa (Xaqa) rumeeyow Samra oo Samirtama kuna Nagaada Dhawridda (Xuduudda Islaaxa) kana Dhawrsada Eebe waxaad Mudantihiin inaad Liibaantaane.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ٱصْبِرُوا۟ وَصَابِرُوا۟
وَرَابِطُوا۟ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿٢٠٠﴾

Eebe ma dayaco Camal Ruux Lab iyo Dhadigba kuwa dar Eebe u hijrooda ee Guryahooda laga Bixiyey ee lagu dhibo Jidka Eebe oo Dagaalama oo la Dilo Eebe wuxuu ku Abaalmarin Dambi Dhaaf iyo Janno. Mana aha in lagu Dhagramo Gagadoonka Gaalada iyo Shaqadooda Adduunyo kanay Sameeyeen oo meelheblay Gaadheen iyo waxaasay soo Saareen. illeen waa wax yar oo Naaru uga Dambayso. Kan Eebe ka Dhawrsadaase Khayrbaa u Yaal Eebe Agtiisa, Eheluu Kitaabkana waxaa ka mid ah kuwo Xaqa Rumeeyey Eebaana Abaal marin, tan kale waa in la adkaysto lana Jahaado Islaamkana la ilaaliyo si loo Liibaano, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Kunagaadi Jidka Eebe Maalin yaa ka Khayr badan Adduunka, iyo waxa ku Sugan korkiisa. (Bukhaari) taasina waxay ku tusin Fadliga jahaadka Jidka Eebe iyo Daaficidda Xuduudda Islaamka iyo Adkeysiga Arrintaas yey Liibaantu tahay Sidaas. Markalana Rasuulku (N.N.E.K. hayeelee) wuxuu yidhi: Laba Indhood ma Taabato Naari il u ooyday Cabsi Eebe iyo il bariday iyadoo Ilaalin Jidka Eebe. (Tirmadi). Wanakaas sharafta Jahaad, Muslimiintuna waxaa Xoog, Sharaf iyo Cisi ugu Dambeysay markay ka tageen Jahaadka iyo Difaaca Xuduudda Islaamka. Aali-Cimraan (195-200).

# Suurat An-Nisaa' سُورَةُ النِّسَاءِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa Ee Naxariis Guud iyo mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Dadow ka Dhawrsada Eebihiina Idinka Abuuray Nafkaliya (Aadam) kana Abuuray xaggeeda Haweenaydeeda (Xaawo) kana Abuuray Xagooda Rag Badan iyo Haweenba, ka Dhawrsada Eebihiinna aad wax isku Warsataan iyo Qaraabada, Eebana wuxuu u Yahay Korkiinna Ilaaliye.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ٱتَّقُوا۟ رَبَّكُمُ ٱلَّذِى خَلَقَكُم مِّن نَّفْسٍ
وَٰحِدَةٍ وَخَلَقَ مِنْهَا زَوْجَهَا وَبَثَّ مِنْهُمَا رِجَالًا كَثِيرًا
وَنِسَآءً ۚ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ ٱلَّذِى تَسَآءَلُونَ بِهِۦ وَٱلْأَرْحَامَ ۚ
إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلَيْكُمْ رَقِيبًا ﴿١﴾

2. Siiya Agoonta xoolahooda hana ku Badalina Xumaan Wanaag, hana Cunina xoolahooda La jirka Xoolihiinna, Taasina waa Dambi weyn.

وَءَاتُوا۟ ٱلْيَتَٰمَىٰٓ أَمْوَٰلَهُمْ ۖ وَلَا تَتَبَدَّلُوا۟ ٱلْخَبِيثَ بِٱلطَّيِّبِ ۖ
وَلَا تَأْكُلُوٓا۟ أَمْوَٰلَهُمْ إِلَىٰٓ أَمْوَٰلِكُمْ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ حُوبًا كَبِيرًا ﴿٢﴾

3. Haddaad ka Cabsataan inaydaan ku Cadaalad Falin Agoonta Guursada wixii idiin Wanaagsan oo Haween ah, Labo, Saddex iyo Afar, Haddaad ka Cabsataan inaydaan Caddaalad Falin Mid kaliya (Guursada) ama waxay Hanatay Gacmihiinnu Saasaa u Dhaw inaydaan Jawrfaline.

وَإِنْ خِفْتُمْ أَلَّا تُقْسِطُوا فِي الْيَتَامَىٰ فَانكِحُوا مَا طَابَ
لَكُم مِّنَ النِّسَاءِ مَثْنَىٰ وَثُلَاثَ وَرُبَاعَ فَإِنْ خِفْتُمْ
أَلَّا تَعْدِلُوا فَوَاحِدَةً أَوْ مَا مَلَكَتْ أَيْمَانُكُمْ ذَٰلِكَ أَدْنَىٰ
أَلَّا تَعُولُوا ﴿٣﴾

4. Siiya Haweenka Meherkooda isagoo Waajib ah hadday idiinka Raali noqoto wax ka mid ah Naftoodu Cuna idinkoo Shifaysan oo Kadban.

وَآتُوا النِّسَاءَ صَدُقَاتِهِنَّ نِحْلَةً فَإِن طِبْنَ لَكُمْ عَن
شَيْءٍ مِّنْهُ نَفْسًا فَكُلُوهُ هَنِيئًا مَّرِيئًا ﴿٤﴾

**Suuraddu waa Suurad Weyn oo Daryeeli Xaqa Haweenka iyo Agoonta iyo kuwa kale waxayna Fari in Eebe laga Dhawrsado illeen waa kan Naf kaliya Dadka ka Abuuraye, Taasoo ah Nabi Aadam. waxaa kaloo Beenaalayaashu ka Sheegi Abuurka Dadka waa waxaan Jirin, sidoo kale waxay fartay Dhawridda Xaqa Qaraabada, Agoonta, Guurka oo lagu Caddaalad Falo haddaan la karayna mid kaliya la Guursado, iyo in Haweenka la Siiyo Meherkooda waxay ka Raalli Noqdaan mooyee, Diinta Islaamkuna wax badan bay ka Digtay Dhibka Agoonta Iyo Haweenka, waxaa Sugnaaday U caabud Eebe sidii Adoo Arka, Haddaadan Arkin Isagaa ku Arkee.**
**Saas darteed waa in la Dhawraa Xuquuqda Dadka Gaar ahaan Agoonta oon la Cunin Xoolahooda Loona Wanaag Falo, iyo Haweenka oo la Siiyo Xaqooda iyo Maherkooda lana Dulmiyin. An-Nisaa' (1-4).**

---

5. Ha Siinina Sufahada (Maamuli karin) Xoolahooda ah kuwo idiinka yeelay Eebe Ilaaliye ka Quudiya kana Arradbixiya una Dhaha Hadal Fiican.

وَلَا تُؤْتُوا السُّفَهَاءَ أَمْوَالَكُمُ الَّتِي جَعَلَ اللَّهُ لَكُمْ قِيَامًا
وَارْزُقُوهُمْ فِيهَا وَاكْسُوهُمْ وَقُولُوا لَهُمْ قَوْلًا مَّعْرُوفًا ﴿٥﴾

6. Imtixaamana Agoonta markay Gaadhaan Guur Haddaad ku Aragtaan (Ogaataan) Rashiidnimo (Wanaag) siiya iyaga Xoolahooda hana u Cunina Xad gudub iyo ka degdagis intayna Weynaan, Ruuxii Hodan ah ha dhawrsado Ruuxii Faqiir ahna ha ka Cuno si Wanaagsan, markaad u Dhiibtaan Xoolahooda Marag u yeela Korkiisa, waana ku Filanyahay Eebe Xisaabiye.

وَابْتَلُوا الْيَتَامَىٰ حَتَّىٰ إِذَا بَلَغُوا النِّكَاحَ فَإِنْ آنَسْتُم
مِّنْهُمْ رُشْدًا فَادْفَعُوا إِلَيْهِمْ أَمْوَالَهُمْ وَلَا تَأْكُلُوهَا
إِسْرَافًا وَبِدَارًا أَن يَكْبَرُوا وَمَن كَانَ غَنِيًّا
فَلْيَسْتَعْفِفْ وَمَن كَانَ فَقِيرًا فَلْيَأْكُلْ بِالْمَعْرُوفِ
فَإِذَا دَفَعْتُمْ إِلَيْهِمْ أَمْوَالَهُمْ فَأَشْهِدُوا عَلَيْهِمْ
وَكَفَىٰ بِاللَّهِ حَسِيبًا ﴿٦﴾

7. Ragga waxaa u Sugnaaday Qayb ka mid ah waxay ka tageen Laba Waalid iyo Qaraabadu Haweenkana waxaa u Sugnaaday Qayb ka mid ah waxay ka Tageen Laba Waalid iyo Qaraabadu

لِّلرِّجَالِ نَصِيبٌ مِّمَّا تَرَكَ الْوَالِدَانِ وَالْأَقْرَبُونَ
وَلِلنِّسَاءِ نَصِيبٌ مِّمَّا تَرَكَ الْوَالِدَانِ وَالْأَقْرَبُونَ

kiisa Yar iyo kiisa Badanba waa Qaddar la Waajibiyey.

مِّمَّا قَلَّ مِنْهُ أَوْ كَثُرَ ۚ نَصِيبًا مَّفْرُوضًا ﴿٧﴾

Dadka Muslimka ah waa Mid kaliya, waana inay is dhaqaaleeyaan, Ciddii Xoolo leh oon is Maamuli karin waa in Gacanta loogu hayaa, laguna Dhaqaaleeyaa, lana Imtixaamo markay qaangaadhaan hadday Maamuli karaanna loo Dhiibo, oon loona Cunin Xadgudub iyo ka Deg degid weynaansho, Ruuxii Hodan ah ha Dhawrsado, kii Faqiir ahna ha ka Cuno si Dhawrid ah, marka Xoolaha la Siinna Marag ha loo yeelo Isagoo Eebe Xisaabiye ku Filanyahay. Rag iyo Haween mid kastaa Qaybuu ku leeyahay waxay ka Tagaan Waalidkood, ama Qaraabadii Yaraa iyo Badnaaba, waa Qader Xukuman. Waxaa Sugnaatay in Nin u Yimid Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuuna ku Yidhi: Waxaan hayaa Agoon Xoola leh Anna Xoolo ma lihi ee wax ma ka Cunaa, wuxuuna ku Yidhi: Ka Cun si fiican oon Xad Gudub ahayn. Taasina waxay ku tusin Dhawridda Xuquuqda Dadka Tabarta Yar, iyo Ilaalinta Arrimahooda, iyo inaan lagu Xad Gudbin. An-Nisaa' (5-7).

---

8. Hadday Joogaan Qaybta Qaraabo, Agoon iyo Masaakiin (aan dhaxlayn) wax ka Siiya una dhaha Hadal Wanaagsan.

وَإِذَا حَضَرَ الْقِسْمَةَ أُولُوا الْقُرْبَىٰ وَالْيَتَامَىٰ
وَالْمَسَاكِينُ فَارْزُقُوهُم مِّنْهُ وَقُولُوا لَهُمْ
قَوْلًا مَّعْرُوفًا ﴿٨﴾

9. Hana ka Cabsadeen kuwa Hadday kaga Tagaan Gadaashooda Caruur Tabar Yar una Cabsan lahaa hana ka Dhawrsadeen Eebe hana Dheheen Hadal Toosan.

وَلْيَخْشَ الَّذِينَ لَوْ تَرَكُوا مِنْ خَلْفِهِمْ ذُرِّيَّةً
ضِعَافًا خَافُوا عَلَيْهِمْ فَلْيَتَّقُوا اللَّهَ وَلْيَقُولُوا
قَوْلًا سَدِيدًا ﴿٩﴾

10. Kuwa u Cunaya Xoolaha Agoonta Dulmi (Xaq darro) waxay uun ku Cunayaan Calooshooda Naar waxayna Gali Saciiro.

إِنَّ الَّذِينَ يَأْكُلُونَ أَمْوَالَ الْيَتَامَىٰ ظُلْمًا
إِنَّمَا يَأْكُلُونَ فِي بُطُونِهِمْ نَارًا ۖ وَسَيَصْلَوْنَ
سَعِيرًا ﴿١٠﴾

11. Wuxuu idiin Dardaarmi Eebe Caruurtiinna kan Lab la mid Qaybta Labo Dhadig, Hadday Yihiin Haween ka Sarreeya Labo waxay Mudan Labo* Dalool wuxuu ka Tagay, hadday tahay mid waxay Mudan Nus, Labada Waalidna mid kastoo ka mid ah wuxuu Mudan Sudus (Lix meelood meel) Hadduu ka Dhintay (Ilmahoodu) Caruur, hadduu Caruur lahayn oy Dhaxlayaan Labada Waalid Hooyadu waxay Mudan Saddex Meelood Meel, Hadduu Walaalo leeyahay Hooyadu waxay Mudan Sudus Dardaaranka iyo Daynta ka Dib, Aabayaalkiina iyo Wiilashana ma

يُوصِيكُمُ اللَّهُ فِي أَوْلَادِكُمْ ۖ لِلذَّكَرِ مِثْلُ حَظِّ
الْأُنثَيَيْنِ ۚ فَإِن كُنَّ نِسَاءً فَوْقَ اثْنَتَيْنِ فَلَهُنَّ
ثُلُثَا مَا تَرَكَ ۖ وَإِن كَانَتْ وَاحِدَةً فَلَهَا النِّصْفُ ۚ
وَلِأَبَوَيْهِ لِكُلِّ وَاحِدٍ مِّنْهُمَا السُّدُسُ مِمَّا تَرَكَ
إِن كَانَ لَهُ وَلَدٌ ۚ فَإِن لَّمْ يَكُن لَّهُ وَلَدٌ وَوَرِثَهُ
أَبَوَاهُ فَلِأُمِّهِ الثُّلُثُ ۚ فَإِن كَانَ لَهُ إِخْوَةٌ فَلِأُمِّهِ
السُّدُسُ ۚ مِن بَعْدِ وَصِيَّةٍ يُوصِي بِهَا أَوْ دَيْنٍ ۗ
آبَاؤُكُمْ وَأَبْنَاؤُكُمْ لَا تَدْرُونَ أَيُّهُمْ أَقْرَبُ

لَكُمْ نَفْعًا فَرِيضَةً مِّنَ ٱللَّهِ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿١١﴾

Ogidin Kooda idinku Dhaw Nacfi, waa Faralyeel «Qaddaraad» Eebe, Ilaahayna waa Oge Falsan.

Aayadda Hore waxay Fari in hadday Qaybta Joogaan Dad aan Dhaxalka lahayn oo Qaraab, Agoon iyo Masaakiin ah wax laga siiyo, Tan kalana in la Dhaqaaleeyo Caruurta Tabar yar sidaad u Jeceshahay in haddaad ka tagto iyagoo kale loo Dhaqaaleeyo, iyo inaan la Cunin Xoolaha Agoonta Cidii Cuntana waxay Cuni Naar, Aayadda dambana waxay Caddaysay Dhaxalka waxayna ka midtahay Saddexda Aayadoo ee Suuraddan ku Sugan ee ka Warramay Dhaxalka, Barashada Dhaxalkana waxaa ku soo arroray isku Boorrin, Sida: Cilmigu waa Saddex waxa ka soo Hadhay waa Siyaado: Aayad Sugan, Sunno Taagan, ama Fariido Caadil ah. waxaa kaloo Sugnaaday: Barta Faraa'isha Barana Dadka waa Cilmiga Nuskiiye, Waana la halmaami, waana waxa ugu Horreeya ee laga Siibi Umaddayda.
Saasaana loo Caddeeyey'oo loo Muujiyey. An-Nisaa' (8-11).

* Saddex meelood laba meel oo ah xoolihii marka saddex loo qeeybiyay labadiisa

---

۞ وَلَكُمْ نِصْفُ مَا تَرَكَ أَزْوَٰجُكُمْ إِن لَّمْ يَكُن لَّهُنَّ وَلَدٌ فَإِن كَانَ لَهُنَّ وَلَدٌ فَلَكُمُ ٱلرُّبُعُ مِمَّا تَرَكْنَ مِنۢ بَعْدِ وَصِيَّةٍ يُوصِينَ بِهَآ أَوْ دَيْنٍ وَلَهُنَّ ٱلرُّبُعُ مِمَّا تَرَكْتُمْ إِن لَّمْ يَكُن لَّكُمْ وَلَدٌ فَإِن كَانَ لَكُمْ وَلَدٌ فَلَهُنَّ ٱلثُّمُنُ مِمَّا تَرَكْتُم مِّنۢ بَعْدِ وَصِيَّةٍ تُوصُونَ بِهَآ أَوْ دَيْنٍ وَإِن كَانَ رَجُلٌ يُورَثُ كَلَٰلَةً أَوِ ٱمْرَأَةٌ وَلَهُۥٓ أَخٌ أَوْ أُخْتٌ فَلِكُلِّ وَٰحِدٍ مِّنْهُمَا ٱلسُّدُسُ فَإِن كَانُوٓا۟ أَكْثَرَ مِن ذَٰلِكَ فَهُمْ شُرَكَآءُ فِى ٱلثُّلُثِ مِنۢ بَعْدِ وَصِيَّةٍ يُوصَىٰ بِهَآ أَوْ دَيْنٍ غَيْرَ مُضَآرٍّ وَصِيَّةً مِّنَ ٱللَّهِ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَلِيمٌ ﴿١٢﴾

12. Waxaa idiin Sugnaaday Nus waxay ka Tagaan Haweenkiinnu haddayna Ilmo lahayn, haddayse lahaayeen Ilmo waxaad leedihiin Rubuc (Afar meelood meel) waxay ka tagaan Dardaaran ay dardaarmeen iyo Dayn ka Dib, Haweenkuna waxay Mudan Rubuc waxaad ka Tagteen Hadday-daan Ilmo lahayn, haddaad Ilmo leedihiin waxay mudan thumun (Siddeed Meelood meel) waxaad ka tagtaan, dardaaran aad dardaarmaysaan iyo Dayn ka Dib, hadduu yahay Ninku mid la Dhaxli Waalid iyo Ilmo la'aan ama Haweenaydu isagoo leh Walaal ama Walaashiis mid kasta wuxuu Mudan Sudus (Hadday la hooya yihiin) hadday yihiin wax ka badan intaas waxay wadaagi thuluth (Saddexmeelood meel) Dardaaran la dardaarmo iyo Dayn ka Dib, isagoon Dardaaranka Cidna lagu Dhibayn, waana Dardaaran Eebe, Ilaahayna waa Oge Dulsan.

Aayaddanna waa Aayadda kale ee Caddaysay Dhaxalka, iyo in Cid walba la Siin waxay Mudatay marka laga bixiyo Dardaaranka iyo Daynta, waana Arrin Eebe adkeeyey Caddeeyeyna, Rasuulkana (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi Eebe wuxuu siiyay Ruux kastaba Xaqiisa ee u dardaaran mid wax dhaxli ma Jiro. (Waa saxiix). waxaa kaloo sugnaatay Dardaaranka oo laysku Dhibo waa Dambiyada Waaweyn. Saas darteed waa in Cid walba la siiyo wixii Eebe u Sugay, Dardaaran iyo kala Jeclaysina inaan lagu dhibin Ruux Xaqiis, Illeen Eebaa Saas faraye, waana in la maqla amarkiisa si loo liibaano Aakhiro iyo Adduunba. An-Nisaa' (12).

13. Taasi waa Xuduud Eebe, Ruuxii Adeeca Eebe iyo Rasuulkiisa wuxuu Galin Jannooyin ay Dareeri Dhexdeeda Wabiyaal iyagoo ku Waari Dhexdeeda, Taasina waa Liibaan weyn.

تِلْكَ حُدُودُ ٱللَّهِ ۚ وَمَن يُطِعِ ٱللَّهَ
وَرَسُولَهُۥ يُدْخِلْهُ جَنَّٰتٍ تَجْرِى
مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَا ۚ
وَذَٰلِكَ ٱلْفَوْزُ ٱلْعَظِيمُ ﴿١٣﴾

14. Ruuxiise Caasiya Eebe iyo Rasuulkiisa oo Tallaaba Xuduudiisa wuxuu Galin Naar isagoo ku Waari Dhexdeeda, wuxuuna Mudan Cadaab wax Dulleeya.

وَمَن يَعْصِ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ وَيَتَعَدَّ
حُدُودَهُۥ يُدْخِلْهُ نَارًا خَٰلِدًا فِيهَا وَلَهُۥ
عَذَابٌ مُّهِينٌ ﴿١٤﴾

15. Kuwa la imaan Xumaan (Zino) oo Haweenkiinna ka mid ah, Marag uga Dhiga Afar idinka mid ah, hadday ku marag Kacaan ku Haya Guryaha intay ka Disho Geeridu ama u yeelo Eebe Waddo.

وَٱلَّٰتِى يَأْتِينَ ٱلْفَٰحِشَةَ مِن نِّسَآئِكُمْ
فَٱسْتَشْهِدُوا۟ عَلَيْهِنَّ أَرْبَعَةً مِّنكُمْ ۖ فَإِن
شَهِدُوا۟ فَأَمْسِكُوهُنَّ فِى ٱلْبُيُوتِ حَتَّىٰ
يَتَوَفَّىٰهُنَّ ٱلْمَوْتُ أَوْ يَجْعَلَ ٱللَّهُ لَهُنَّ سَبِيلًا ﴿١٥﴾

16. Labadii la Timaadda Xumaanta (Zinada) oo idinka mid ah Dhiba Haddayse Toobadkeenaan ooy Wanaagsanaadaan ka Jeedsada Xagooda, Eebana waa Toobad aqbale Naxariista.

وَٱلَّذَانِ يَأْتِيَٰنِهَا مِنكُمْ فَـَٔاذُوهُمَا ۖ
فَإِن تَابَا وَأَصْلَحَا فَأَعْرِضُوا۟ عَنْهُمَآ ۗ
إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ تَوَّابًا رَّحِيمًا ﴿١٦﴾

Aayadaha la soo Sheegay waxay Caddeeyeen Qaddar iyo Qaybta Ruux kasta iyo in Eebe Ruuxba Qayb siiyay, u Dhawaanshaha Ruuxa Dhintay iyo Dhibaatadiisa wuxuuna Faray inaan la Tallaabin Xuduudaas Eebe oon Cidna loo Badinin midna loo Yareynin, waase in loo daayo Xukunka Eebe iyo Qaybintiisa, Ciddii Saas Fulisana Abaalkeedu waa Janno, tii ka leexatana waxay Mudan Ciqaab daran iyo Cadaab wax Dulleeya. Tan kale Islaamku markuu Bilaawday Hadday Haweenaydu Xumaan Zino ku Kacdo marag baa loo yeeli Jiray gurigana way iska Joogi Jirtay intay ka Dhimato ama Sharci Caddeeyo Xaalkeeda, Labada Kala Zinaysatana waxaa lagu Ciqaabi jiray Dhib aan Saas u Weynayn, Hase yeeshee waxaa ku Soodagay Arrintaas Xukun ah in Ciddii ku Kacda Xaalkaas isagoo horay wax u Guursaday isna Arkeen lagu Ciqaabi Dhagax lagu Dilo, Kuwaan hadda ka Hor Guursaninna Boqol Ulood lagu Dhufto, Saasuu Rasuulku (Naxariis iyo Nabadgalye Eebe korkiisa ha yeelee) yidhi: Iga Qaata Labada Bikaarada ah waa Boqol Ulood, Labada wax Guursatayna waa Boqol Ulood iyo Dhagax lagu dilo. (Muslim) An-Nisaa' (13-16).

---

17. Toobadda (Aqbalkeeda) waxay Eebe uga ahaatay kuwa Fala Xumaha iyagoo Jaahil ah markaas Toobad keena Waqti dhaw Kuwaas wuu ka Toobad aqbalaa Eebe korkooda, Eebana waa Oge Falsan.

إِنَّمَا ٱلتَّوْبَةُ عَلَى ٱللَّهِ لِلَّذِينَ يَعْمَلُونَ ٱلسُّوٓءَ
بِجَهَٰلَةٍ ثُمَّ يَتُوبُونَ مِن قَرِيبٍ فَأُو۟لَٰٓئِكَ يَتُوبُ
ٱللَّهُ عَلَيْهِمْ ۗ وَكَانَ ٱللَّهُ عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿١٧﴾

18. Uma aha Toobaddu ku Fala Xumaha intuu uga Yimaaddo Midkood Geeridu markaas dhaha Anigu waxaan Toobad keeni hadda, iyo Kuwa Dhiman Iyagoo Gaala ah, Kuwaas waxaan u Darabnay Cadaab Daran.

وَلَيْسَتِ ٱلتَّوْبَةُ لِلَّذِينَ يَعْمَلُونَ
ٱلسَّيِّـَٔاتِ حَتَّىٰٓ إِذَا حَضَرَ أَحَدَهُمُ ٱلْمَوْتُ
قَالَ إِنِّى تُبْتُ ٱلْـَٔـٰنَ وَلَا ٱلَّذِينَ يَمُوتُونَ
وَهُمْ كُفَّارٌ ۚ أُو۟لَـٰٓئِكَ أَعْتَدْنَا لَهُمْ عَذَابًا
أَلِيمًا ﴿١٨﴾

19. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow idiinma Banaana inaad u Dhaxashaan Haweenka Xoog iyo inaad dhibtaan si aad ula tagtaan (Qaadataan) Qaar waxaad Siiseen inay la Yimaadaan Xumaan Cad Mooyee, kulana Noolaada si Fiican, haddaad Kahataan waxaa Suurowda inaad Kahataan wax uu Yeelo Eebe dhexdiisa Khayr Badan.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا يَحِلُّ لَكُمْ أَن تَرِثُوا۟
ٱلنِّسَآءَ كَرْهًا ۖ وَلَا تَعْضُلُوهُنَّ لِتَذْهَبُوا۟ بِبَعْضِ
مَآ ءَاتَيْتُمُوهُنَّ إِلَّآ أَن يَأْتِينَ بِفَـٰحِشَةٍ مُّبَيِّنَةٍ ۚ
وَعَاشِرُوهُنَّ بِٱلْمَعْرُوفِ ۚ فَإِن كَرِهْتُمُوهُنَّ
فَعَسَىٰٓ أَن تَكْرَهُوا۟ شَيْـًٔا وَيَجْعَلَ ٱللَّهُ فِيهِ
خَيْرًا كَثِيرًا ﴿١٩﴾

20. Haddaad Doontaan inaad ku Baddashaan Haweenay mid kale idinkoo Siiyey Meher (Badan) ha ka Qaadanina Xaggiisa waxba, Ma waxaad Qaadanaysaan Been iyo Dambi Cad.

وَإِنْ أَرَدتُّمُ ٱسْتِبْدَالَ زَوْجٍ مَّكَانَ زَوْجٍ
وَءَاتَيْتُمْ إِحْدَىٰهُنَّ قِنطَارًا فَلَا تَأْخُذُوا۟ مِنْهُ
شَيْـًٔا ۚ أَتَأْخُذُونَهُۥ بُهْتَـٰنًا وَإِثْمًا مُّبِينًا ﴿٢٠﴾

21. Seed uga Qaadanaysaan idinkoo Qaarkiin Qaar Arkay, ood kana Qaaddeen Ballan Adag.

وَكَيْفَ تَأْخُذُونَهُۥ وَقَدْ أَفْضَىٰ بَعْضُكُمْ
إِلَىٰ بَعْضٍ وَأَخَذْنَ مِنكُم مِّيثَـٰقًا
غَلِيظًا ﴿٢١﴾

22. Ha Guursanina waxay Guursadeen Aabayaashiin wixii hor maray mooyee, waa Xumaan iyo wax loo cadhoodo Waddana Iyadaa U xun.

وَلَا تَنكِحُوا۟ مَا نَكَحَ ءَابَآؤُكُم مِّنَ
ٱلنِّسَآءِ إِلَّا مَا قَدْ سَلَفَ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ
فَـٰحِشَةً وَمَقْتًا وَسَآءَ سَبِيلًا ﴿٢٢﴾

Dadku wuu Dambaabi waase inuu Toobadkeeno Suginna inta Geerida uga imaan Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Eebe wuu Aqbalaa Toobadda Addonkiisa intaan Sakaraadku u Imaan.

Mujaahidna Wuxuu yidhi: Cid kastoo Eebe Caasiday waa Jaahil Intay ka tagto. Aayadaha kale waxay Caddayn inaan la Dulmiyin Haweenka, lana Dhibin Xoolahoodana laga Xoogin, waxaa kale oo Reebban in la Guursado Haweenaydii Aabahaa, Arrimahaasuna waa Reebbanyihiin, waana Dambi Weyn. An-Nisaa' (17-22).

23. Waxaa laydinka Reebay Hooyooyinkiin (inaad Guursataan) iyo Gabdhihiinna, Walaalihiin, Eedooyinkiin, Habaryarihiin, Gabdhaha Walaalkaa, Gabdhaha walaashaa, Hooyooyinka idin Nuujiyey Walaalaha Nuugmada Hooyooyinka Haweenkiinna, Gabdhaad Dhaqaalaysaan, ee Haweenkiinna aad is aragteen Dhaleen, Haddaydaan is arkin wax dhib ah (Danbi) ma saara korkiinna, Haweenka Wiilashiinna Dhabta ah, iyo inaad kulmisaan Labo Walaalo ah wixii horay maray mooyee, Eebana waa u Dhaafe Naxariista.

حُرِّمَتْ عَلَيْكُمْ أُمَّهَٰتُكُمْ وَبَنَاتُكُمْ
وَأَخَوَٰتُكُمْ وَعَمَّٰتُكُمْ وَخَٰلَٰتُكُمْ وَبَنَاتُ
ٱلْأَخِ وَبَنَاتُ ٱلْأُخْتِ وَأُمَّهَٰتُكُمُ ٱلَّٰتِىٓ
أَرْضَعْنَكُمْ وَأَخَوَٰتُكُم مِّنَ ٱلرَّضَٰعَةِ
وَأُمَّهَٰتُ نِسَآئِكُمْ وَرَبَٰٓئِبُكُمُ ٱلَّٰتِى
فِى حُجُورِكُم مِّن نِّسَآئِكُمُ ٱلَّٰتِى
دَخَلْتُم بِهِنَّ فَإِن لَّمْ تَكُونُوا۟ دَخَلْتُم
بِهِنَّ فَلَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ وَحَلَٰٓئِلُ
أَبْنَآئِكُمُ ٱلَّذِينَ مِنْ أَصْلَٰبِكُمْ
وَأَن تَجْمَعُوا۟ بَيْنَ ٱلْأُخْتَيْنِ إِلَّا مَا قَدْ
سَلَفَ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿٢٣﴾

24. (Waxaa Kaloo idinka reeban) Haweenka la Qabo, waxay Hantaan Gacmihiinnu mooyee Kitaabka Eebaa korkiinna ah, waxaa laydiin banneeyey waxa ka Soohadhay kuwaas inaad ku dalabtaan Xoolahiinna idinkoo dhawrsoon oon Xumaan (Zino) Falin, waxaad ku intifaacdaan Xaggooda Siiya Meherkooda waa Qadaraad Eebe, Dhib (Dambi) korkiinna ma Saarra waxaad isaga raalli Noqoteen Qadarrida ka Dib, Eebana waa Oge Falsan.

۞ وَٱلْمُحْصَنَٰتُ مِنَ ٱلنِّسَآءِ إِلَّا مَا مَلَكَتْ
أَيْمَٰنُكُمْ ۖ كِتَٰبَ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ ۚ وَأُحِلَّ لَكُم
مَّا وَرَآءَ ذَٰلِكُمْ أَن تَبْتَغُوا۟ بِأَمْوَٰلِكُم مُّحْصِنِينَ
غَيْرَ مُسَٰفِحِينَ ۚ فَمَا ٱسْتَمْتَعْتُم بِهِۦ مِنْهُنَّ
فَـَٔاتُوهُنَّ أُجُورَهُنَّ فَرِيضَةً ۚ وَلَا جُنَاحَ
عَلَيْكُمْ فِيمَا تَرَٰضَيْتُم بِهِۦ مِنۢ بَعْدِ ٱلْفَرِيضَةِ ۚ
إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿٢٤﴾

Aayaddani waxay Caddayn waxa ka Reeban ninka Inuu Guursado oo Haween ah, Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Waxay ku XarriMantay Todobo Nasab, Todobana Xigid. Sidoo kale Cidda wax Nuujisa iyo tan kula Nuugta. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Waxaa ku Reeban Nuugmada waxa ku reeban Nasabka, waase inay ahaato Shan Nuugmo. Sidoo kale waxaa Reeban Haweenay la Qabo, Eebana waa Oge Falsan oo waxa Fiican ku Toosin Dadka. An-Nisaa’ (23-24).

---

25. Ruuxaan Karin oo idinka mid ah Awood uu ku Guursado Haweenka Dhawrsoon ee rumeysan (Xaqa) ha Guursado waxay hanatay Gacmihiin-

وَمَن لَّمْ يَسْتَطِعْ مِنكُمْ طَوْلًا أَن يَنكِحَ
ٱلْمُحْصَنَٰتِ ٱلْمُؤْمِنَٰتِ فَمِن مَّا مَلَكَتْ

nu oo ah Gabdhaha Rumeysan (Xaqa) Eebana waa ogyahay Iimaankiinna, Qaarkiin Qaarbuu ka ahaaday, kuna guursada idamka Ehelkooda u Siiyana Ujuurada (Meherkooda) si Fiican, iyagoo Dhawrsoon oo Xumaan (Zino) ka Dheer, Saaxiibana yeelanayn, Haddii lagu dhawro (Guur) ooy Xumaan la Yimaadaan korkooda waxaa ah Nus waxa ah kuwa Xorta ah oo Ciqaab ah, Arrintaas waa Ruuxii ka Cabsada Zino, oo idinka mid ah, Haddaadse Samirtaan yaa idiin khayr roon, Eebana waa Dambi Dhaafe Naxariista.

أَيْمَٰنُكُم مِّن فَتَيَٰتِكُمُ ٱلْمُؤْمِنَٰتِ ۚ وَٱللَّهُ أَعْلَمُ بِإِيمَٰنِكُم ۚ بَعْضُكُم مِّنۢ بَعْضٍ ۚ فَٱنكِحُوهُنَّ بِإِذْنِ أَهْلِهِنَّ وَءَاتُوهُنَّ أُجُورَهُنَّ بِٱلْمَعْرُوفِ مُحْصَنَٰتٍ غَيْرَ مُسَٰفِحَٰتٍ وَلَا مُتَّخِذَٰتِ أَخْدَانٍ ۚ فَإِذَآ أُحْصِنَّ فَإِنْ أَتَيْنَ بِفَٰحِشَةٍ فَعَلَيْهِنَّ نِصْفُ مَا عَلَى ٱلْمُحْصَنَٰتِ مِنَ ٱلْعَذَابِ ۚ ذَٰلِكَ لِمَنْ خَشِىَ ٱلْعَنَتَ مِنكُمْ ۚ وَأَن تَصْبِرُوا۟ خَيْرٌ لَّكُمْ ۗ وَٱللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٢٥﴾

26. Wuxuu Dooni Eebe inuu idiin Caddeeyo Idinkuna Hanuuniyo Wadadii kuwii idinka Horreeyey oo idinka Toobad aqbalo Eebana waa Oge Falsan.

يُرِيدُ ٱللَّهُ لِيُبَيِّنَ لَكُمْ وَيَهْدِيَكُمْ سُنَنَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِكُمْ وَيَتُوبَ عَلَيْكُمْ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿٢٦﴾

27. Eebe wuxuu dooni inuu idinka Toobad aqbalo waxayse dooni kuwii Raacay waxa Naftoodu Jeceshahay inaad iilataan iilasho wayn.

وَٱللَّهُ يُرِيدُ أَن يَتُوبَ عَلَيْكُمْ وَيُرِيدُ ٱلَّذِينَ يَتَّبِعُونَ ٱلشَّهَوَٰتِ أَن تَمِيلُوا۟ مَيْلًا عَظِيمًا ﴿٢٧﴾

28. Wuxuu dooni Eebe inuu idinka Fudeydiyo, waxaase La Abuuray Dadka isagoo tabar Yar.

يُرِيدُ ٱللَّهُ أَن يُخَفِّفَ عَنكُمْ ۚ وَخُلِقَ ٱلْإِنسَٰنُ ضَعِيفًا ﴿٢٨﴾

**Waa in Guurku ahaadaa mid laga Fiirsado, oo la guursadaa Haweenka Xorta ah ee Dhawrsoon, haddii Tabar loo waayana la guursado kuwa Dhawrsoon ood hanataan haddaad Xumaan ka yaabtaan, iyagoo la warsan Ehelkooda, Xumaan hadday falaanna waxaa la Ciqaabi Nus Ciqaabta kuwa Xorta ah.**
**Tan kale Eebe Wanaag iyo Hanuun yuu inala Rabaa iyo Fudayd, kuwa Xumaanta iyo waxay Naftoodu Jeceshahay Raacayse waxay idinla Dooni inaad si Weyn u Dhuntaan. Wax badan baa ku soo arooray Tabaryarida Dadka. Xagga Cibaadada iyo Xagga Dooniddaba. An-Nisaa' (25-28).**

---

29. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow ha Cunina Xoolihiinna dhexdiinna (Si Baadil ah) (Xaaraam ah) inay Ganacsi Raalli aad tihiin tahay mooyee, hana

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَأْكُلُوٓا۟ أَمْوَٰلَكُم بَيْنَكُم بِٱلْبَٰطِلِ إِلَّآ أَن تَكُونَ تِجَٰرَةً عَن تَرَاضٍ مِّنكُمْ ۚ وَلَا تَقْتُلُوٓا۟ أَنفُسَكُمْ

Dilina Naftiinna, Eebe wuxuu idiinyahay Naxariistee.

إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ بِكُمْ رَحِيمًا ﴿٢٩﴾

30. Cidii u Fasha Arrintaas Colnimo iyo Dulmi Waxaannu galin Doonnaa Naar, Arrintaasna Eebe waa u Fududahay.

وَمَن يَفْعَلْ ذَٰلِكَ عُدْوَٰنًا وَظُلْمًا فَسَوْفَ
نُصْلِيهِ نَارًا ۚ وَكَانَ ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ
يَسِيرًا ﴿٣٠﴾

31. Haddaad ka Dheeraataan Dambiyada waa weyn waxaan idinka Reebeynno waxaannu ka asturi Xaggiinna Xumaantiinna waxaana idin Galin Meel Fiican (Sharaf leh).

إِن تَجْتَنِبُوا۟ كَبَآئِرَ مَا تُنْهَوْنَ عَنْهُ نُكَفِّرْ
عَنكُمْ سَيِّـَٔاتِكُمْ وَنُدْخِلْكُم مُّدْخَلًا
كَرِيمًا ﴿٣١﴾

32. Ha tamaniyina wuxuu kaga Fadilay Eebe Qaarkiin Qaar, Ragga waxaa u Sugnaaday Qayb waxay kasbadeen, Haweenkana waxaa u Sugnaaday qayb waxay kasbadeen, Waydiista Eebe Fadligiisa, Eebana waxkasta waa Ogyahay.

وَلَا تَتَمَنَّوْا۟ مَا فَضَّلَ ٱللَّهُ بِهِۦ بَعْضَكُمْ
عَلَىٰ بَعْضٍ ۚ لِّلرِّجَالِ نَصِيبٌ مِّمَّا ٱكْتَسَبُوا۟ ۖ
وَلِلنِّسَآءِ نَصِيبٌ مِّمَّا ٱكْتَسَبْنَ ۚ وَسْـَٔلُوا۟ ٱللَّهَ
مِن فَضْلِهِۦٓ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ بِكُلِّ شَىْءٍ
عَلِيمًا ﴿٣٢﴾

33. Cid kasta waxaan u Yeellay Kuwo dhaxla waxay ka tageen Labada waalid iyo Qaraabadu iyo kuwaad Guntateen Dhaar (Isdhaarsateen) siiya Qaybtooda, (oo Gargaar ah), Eebana wax kasta waa u Marag.

وَلِكُلٍّ جَعَلْنَا مَوَٰلِىَ مِمَّا تَرَكَ ٱلْوَٰلِدَانِ
وَٱلْأَقْرَبُونَ ۚ وَٱلَّذِينَ عَقَدَتْ أَيْمَٰنُكُمْ
فَـَٔاتُوهُمْ نَصِيبَهُمْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلَىٰ كُلِّ
شَىْءٍ شَهِيدًا ﴿٣٣﴾

**Aayaddaha Hore waxay Caddayn Xaaraanimada Xoolaha Dadka oo Xaq darro lagu Cuno Ganacsiga Xalaasha ah ee lagu Heshiiyase waa Banaanyahay, Is dilkuna waareebban yahay illen Muslimiintu waa Naf kaliyee, Cidii Saas fashana waxaa lagu Ciqaabi Naar, haddii Dambiyada WaaWeyn laga dhawrsadana Eebe wuu Dhaafi Xumaanta kale Jannana wuu galin, Xasadka iyo Niyad Xumiduna waa la reebay, cid walbase waxaa u banaan Shaqo iyo Kasab xalaala iyo inuu Eebe wax warsado, Cid walbana Mudan waxay Waalidku iyo Qaraabadu ka tagaan, iyadoo wax laga siin Cidaad is Xidhiidhisaan, Dambiyada waaWeyna waxaa ka mid ah: Gaalnimo, Dil Xaq darro, ee Muslim, ka cararka Jahaadka, Caasiga Waalidka Zino ku sheegga Haweeney Dhawrsoon, Barashada Sixirka, Cunidda Ribada iyo Cunidda Xoolaha Agoonta. Zinada, Dhaarta Beenta ah, iyo Kuwo kale. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Dambiyada waa Weyn Todoba waxay uga Dhawyihiin Todobaatan. An-Nisaa' (29-33).**

---

34. Raggaa u taagan (Maamulka) Haweenka, ka Fadilida Eebe Qaarkood Qaar iyo ku nafaqaynta Xoolahooda darteed, (Haweenka) Wanaagsan wayAdeecaan Ilaaliyaanna Maqnaas-

ٱلرِّجَالُ قَوَّٰمُونَ عَلَى ٱلنِّسَآءِ بِمَا فَضَّلَ ٱللَّهُ
بَعْضَهُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ وَبِمَآ أَنفَقُوا۟ مِنْ أَمْوَٰلِهِمْ ۚ
فَٱلصَّٰلِحَٰتُ قَٰنِتَٰتٌ حَٰفِظَٰتٌ لِّلْغَيْبِ

ho ilaalinta Eebe Darteed, kuwaadse ka Cabsataan Caasinimadooda waaniya, kagana Fogaada Jiifka Edbiyana, hadday idin Adeecaanna ha u dalbina Korkooda jid (inaad dhibtaan), Eebana waa Sare Wayn.

بِمَا حَفِظَ ٱللَّهُ ۚ وَٱلَّٰتِى تَخَافُونَ نُشُوزَهُنَّ
فَعِظُوهُنَّ وَٱهْجُرُوهُنَّ فِى ٱلْمَضَاجِعِ
وَٱضْرِبُوهُنَّ ۖ فَإِنْ أَطَعْنَكُمْ فَلَا تَبْغُوا۟ عَلَيْهِنَّ
سَبِيلًا ۗ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلِيًّا كَبِيرًا ﴿٣٤﴾

35. Haddaad ka Cabsataan Iskhilaaf-ka Dhexdooda u bixiya Xaq soore Ehelkiisa ah iyo Xaq soore Ehelkeeda ah, hadday doonaan Wanaajinna Eebe wuu iswaafajin Dhexdooda, Eebana waa Oge Xeeldheer.

وَإِنْ خِفْتُمْ شِقَاقَ بَيْنِهِمَا فَٱبْعَثُوا۟ حَكَمًا مِّنْ
أَهْلِهِۦ وَحَكَمًا مِّنْ أَهْلِهَآ إِن يُرِيدَآ إِصْلَٰحًا
يُوَفِّقِ ٱللَّهُ بَيْنَهُمَآ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلِيمًا خَبِيرًا ﴿٣٥﴾

36. Caabuda Eebe hana la Wadaajinina waxba, Labada Waalidna u Wanaag fala, iyo Qaraabada, Agoonta, Masaakiinta, Dariska dhaw, DariskaDurugsan, Saaxiibka Dhinaca, Socotada iyo waxay hanatay Gacmihiinnu, Eebana ma Jecla Cidda Kibirka badan ee Faanka badan.

۞ وَٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ وَلَا تُشْرِكُوا۟ بِهِۦ شَيْـًٔا ۖ
وَبِٱلْوَٰلِدَيْنِ إِحْسَٰنًا وَبِذِى ٱلْقُرْبَىٰ وَٱلْيَتَٰمَىٰ
وَٱلْمَسَٰكِينِ وَٱلْجَارِ ذِى ٱلْقُرْبَىٰ وَٱلْجَارِ
ٱلْجُنُبِ وَٱلصَّاحِبِ بِٱلْجَنۢبِ وَٱبْنِ
ٱلسَّبِيلِ وَمَا مَلَكَتْ أَيْمَٰنُكُمْ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ
لَا يُحِبُّ مَن كَانَ مُخْتَالًا فَخُورًا ﴿٣٦﴾

Ragga iyo Haweenka Eebaa isu abuuray mid walbana si u abuuray, una yeelay Shaqooyin lagu kala haboonyahay sida uurka, Nuujinta iyo wixii la mid ah, saas darteed mar haddii meel lagu wada noolyahay waa in Ninku ilaaliyaa Qoyska oo nafaqeeyaa, oo Hogaamiye u noqdaa, Haweeneyda Fiicanna waa tan Suuban ee Dhawrsoon, hadday Gaftana waa la Waanin, haddii laga Noogana waa laga fogaan Jiifka, lana edbin, hadday toosnaato wax Jid ah laguma leh, hadduu Khilaafyimaadana waxaa loo bixin Qaraabada labada Dhinac, oo is waafajin Eebana waa in la Caabudo waxna lala wadaajin, loona Samo falo Waalidka, Qaraabada Agoonta, Masaakiinta, Dariska dhaw, Dariska Durugsan, Saaxiibka Dhabta ah Socotoda, iyo waxa Gacmahooda ku hoos jira. Kibir iyo Faanna Eebe ma jecla. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Waxaa ku wareega Ehelka Muxamed Haween ka Sheegan Ragooda, Ragaasina ma aha kuwo Fiican (Abuu Daawuud..) balday Aayadahan sida Islaamka ugu dadaali Wanaagga, Heshiiska, Naxariista, iyo isdhaqaalaynta iyo is taakulaynta. Saaxiibka U Fiican waa kan u Fiican Saaxiibkii, (Imaam axmed) Taasina waxay dharbaaxo ku tahay kuwa islaamka iyo Haweenkiisa wax ka sheega een wax kasayn. An-Nisaa' (34-36).

---

37. Oo ah kuwa Bakhayla Farana Dadka Bakhaylnimo qarinna wuxuu Siiyey Eebe oo Fadli ah, waxaana u darabnay Gaalada cadaab wax dulleeya.

ٱلَّذِينَ يَبْخَلُونَ وَيَأْمُرُونَ ٱلنَّاسَ بِٱلْبُخْلِ
وَيَكْتُمُونَ مَآ ءَاتَىٰهُمُ ٱللَّهُ مِن فَضْلِهِۦ ۗ
وَأَعْتَدْنَا لِلْكَٰفِرِينَ عَذَابًا مُّهِينًا ﴿٣٧﴾

38. Iyo kuwa u bixiya Xoolahooda istuska Dadka oon rumeyn Eebe iyo

وَٱلَّذِينَ يُنفِقُونَ أَمْوَٰلَهُمْ رِئَآءَ ٱلنَّاسِ

Maalinta Dambe, ruuxii shaydaan u noqdo Saaxiib wuu Xumaaday Saaxiibkiis.

وَلَا يُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ وَلَا بِٱلْيَوْمِ ٱلْآخِرِ ۗ وَمَن يَكُنِ
ٱلشَّيْطَٰنُ لَهُۥ قَرِينًا فَسَآءَ قَرِينًا ﴿٣٨﴾

39. Maxaa korkooda ah hadday Rumeeyaan Eebe iyo Maalinta Dambe oy Bixiyaan Qayb wuxuu ku Arzuqay Eebe, Ilaahayna waa Ogyahay iyaga.

وَمَاذَا عَلَيْهِمْ لَوْ ءَامَنُوا۟ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْآخِرِ وَأَنفَقُوا۟
مِمَّا رَزَقَهُمُ ٱللَّهُ ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ بِهِمْ عَلِيمًا ﴿٣٩﴾

40. Eebe ma Dulmiyo wax la eg Darro (waxyar) hadday Wanaagtahayna wuu laab laabaa wuuna ka siin Agtiisa Ajir Weyn.

إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَظْلِمُ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ ۖ وَإِن تَكُ حَسَنَةً
يُضَٰعِفْهَا وَيُؤْتِ مِن لَّدُنْهُ أَجْرًا عَظِيمًا ﴿٤٠﴾

41. ee Say ahaan Markaan ka keenno Umad kasta marag oon kuu keenno adigana (Nabiga) kuwaas korkooda Marag.

فَكَيْفَ إِذَا جِئْنَا مِن كُلِّ أُمَّةٍۭ بِشَهِيدٍ وَجِئْنَا
بِكَ عَلَىٰ هَٰٓؤُلَآءِ شَهِيدًا ﴿٤١﴾

42. Maalintaas waxay Jeclaan kuwii Gaaloobay oo Caasiyey Rasuulka in lala Simo (Liqo) Dhulka kamana Qariyaan Eebe Hadal.

يَوْمَئِذٍ يَوَدُّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَعَصَوُا۟ ٱلرَّسُولَ لَوْ
تُسَوَّىٰ بِهِمُ ٱلْأَرْضُ وَلَا يَكْتُمُونَ ٱللَّهَ حَدِيثًا ﴿٤٢﴾

**Bakhaylnimadu waa Ceeb waana la Caayey, waxaabase ka sii daran inaad fartid Dadka Bakhaylnimo, waana inaad Xaqa wax ku bixin weydo, ama Qariso wax Wanaag ah ee Eebe ku siiyey ama wax u Bixiso istustus aadan dar Eebe u bixinin, kuwaas Shaydaan baa ka Saaxiibyeeshay, Cidduu la Saaxiibana way Khasaartay, waase in la rumeeyo Eebe iyo Qiyaamada waxna la baxsado, illeen Eebe Dadka kama dulmiyo wax yarnee, hadday Wanaagtahayna wuu u Laab laabi oo siin Ajir weyn, Xaalkuse sees noqon marka Umad walba Marag loo keeno, Nabigana Marag loogu keeno Umaddiisa Maalintaas gaalada Rasuulka Caasiday waxay Jeclaan in Dhulku la go'o, Cid wax ka qarin Eebana ma jirto. Waxaa sugnaaday marka Eebe u Nicmeeyo Addoon wuxuu Jecelyahay inay ka muuqato Raadkeedu. Cabdullaahi Binu Mascuud wuxuu Yidhi: Rasuulkaa i yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeele) Igu Akhri Quraanka markaasaan idhi ma waxaan kugu akhriyaa Adoo lagugu soo dajiyey? markaasuu yidhi: Waxaan Jeclahay inaan Cid kale ka maqlo, markaasaan ku akhriyey Suuratu Nisaa intaan ka gaadho: Say ahaan markaan uga keenno Ummad kasta Marag.. markaasuu yidhi: waa ku filantahay isagoy Indhihiisu Ilmayn. (Bukhaari). An-Nisaa' (37-42).**

---

43. kuwa (Xaqa) Rumeeyow haw dhawaanina Salaadda idinkoo sakhraansan intaad ka garataan waxaad dhahaysaan iyo idinkoo Junub ah inaad Jid gudbaysaan mooyee intaad ka maydhataan, haddaad tihiin kuwa Buka ama Safar ah ama ka yimid Ruux idin ka mid ah kortag, ama Taabataan haweeneey aadanna helayn Biyo ku Gagabaysta Carro Wanaagsan, kuna masaxa (Mariya) Wajiyadiinna iyo Gac-

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَقْرَبُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ وَأَنتُمْ
سُكَٰرَىٰ حَتَّىٰ تَعْلَمُوا۟ مَا تَقُولُونَ وَلَا جُنُبًا إِلَّا
عَابِرِى سَبِيلٍ حَتَّىٰ تَغْتَسِلُوا۟ ۚ وَإِن كُنتُم مَّرْضَىٰٓ أَوْ عَلَىٰ
سَفَرٍ أَوْ جَآءَ أَحَدٌ مِّنكُم مِّنَ ٱلْغَآئِطِ
أَوْ لَٰمَسْتُمُ ٱلنِّسَآءَ فَلَمْ تَجِدُوا۟ مَآءً فَتَيَمَّمُوا۟
صَعِيدًا طَيِّبًا فَٱمْسَحُوا۟ بِوُجُوهِكُمْ وَأَيْدِيكُمْ ۗ إِنَّ

ٱللَّهَ كَانَ عَفُوًّا غَفُورًا ﴿٤٣﴾

mihiinna, Eebana waa Cafiye Dambi dhaafa.

أَلَمْ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ نَصِيبًا مِّنَ ٱلْكِتَٰبِ
يَشْتَرُونَ ٱلضَّلَٰلَةَ وَيُرِيدُونَ أَن تَضِلُّوا۟ ٱلسَّبِيلَ ﴿٤٤﴾

44. Ka warran kuwa la siiyey Qayb Kitaabka ah (Tawreed) oo Gadan Baadi doonina inaad ka Dhuntaan Jidka.

وَٱللَّهُ أَعْلَمُ بِأَعْدَآئِكُمْ ۚ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ وَلِيًّا وَكَفَىٰ
بِٱللَّهِ نَصِيرًا ﴿٤٥﴾

45. Eebaa Og Colkiinna, waxaana ku filan Eebe, wuxuuna ugu filanyahay Eebe Gargaare.

مِّنَ ٱلَّذِينَ هَادُوا۟ يُحَرِّفُونَ ٱلْكَلِمَ عَن مَّوَاضِعِهِۦ
وَيَقُولُونَ سَمِعْنَا وَعَصَيْنَا وَٱسْمَعْ غَيْرَ مُسْمَعٍ
وَرَٰعِنَا لَيًّۢا بِأَلْسِنَتِهِمْ وَطَعْنًا فِى ٱلدِّينِ ۚ وَلَوْ أَنَّهُمْ
قَالُوا۟ سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا وَٱسْمَعْ وَٱنظُرْنَا لَكَانَ خَيْرًا
لَّهُمْ وَأَقْوَمَ وَلَٰكِن لَّعَنَهُمُ ٱللَّهُ بِكُفْرِهِمْ فَلَا يُؤْمِنُونَ
إِلَّا قَلِيلًا ﴿٤٦﴾

46. Kuwii Yuhuudoobay waxay ka Leexin Kalimooyinka Meelahooda waxayna dhihi waan Maqalay oon Caasinay, Maqla ha maqlinee, waxayna (dhihi) na ilaali iilid Carrabkooda iyo Durid Diinta (Islaamka) darteed, hadday dhahaan waan maqalay waana Adeecnay ee maqal na dayna saasaa u khayroonaan lahayd una toosnaanlahayd, laakiin waxaa lacnaday Eebe Gaalnimadooda Darteed mana Rumeeyaan wax yar mooyee.

**Ruuxaan kasayn wuxuu ku Hadli ma bannaana inuu Salaadda galo, sidii kuwii Tukanaayey iyagoo wax maskaxda dooriyey Cabba, tan kale Eebe ma Cidhiidhyin Muslimka, oo cidda Junubta, ama Jirran, ama Safar ah, ama Kortaga, ama Haween Taabata oon Biyo helin wuu gagabaysan, Taasoo ah inuu Carrada Wajiga iyo Gacmaha mariyo, Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi Dhulka Masjidbaa nalooga dhigay Carradiisana Daahir.**
**Aayadaha kale waxay ka warrami Yuhuud iyo Xumaantooda iyo Say Xaqa uga leexdeen, una leexiyeen, haddallo Xun iyo Dhibna ay ugu hadlaan, Taasina waa waxa Eebe ku Nacladay uguna Cadhooday, waana Caado ay iska leeyihiin oy iska dhaxleen xaq Diidka iyo Xumaan Jecaylka. An-Nisaa' (43-46).**

---

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ ءَامِنُوا۟ بِمَا نَزَّلْنَا
مُصَدِّقًا لِّمَا مَعَكُم مِّن قَبْلِ أَن نَّطْمِسَ وُجُوهًا
فَنَرُدَّهَا عَلَىٰٓ أَدْبَارِهَآ أَوْ نَلْعَنَهُمْ كَمَا لَعَنَّآ أَصْحَٰبَ
ٱلسَّبْتِ ۚ وَكَانَ أَمْرُ ٱللَّهِ مَفْعُولًا ﴿٤٧﴾

47. Kuwa la siiyey Kitaabkow Rumeeya waxaan soo dajinay isagoo rumeyn waxaad haysataan ka hor tirid wajiyaal oon u Celino gadaasheeda ama Nacladno sidaan u Nacladnay Asaxaabtii (Kuwii) Sabtida (Yuhuudda) amarka Eebana waa kan lafalo.

إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَغْفِرُ أَن يُشْرَكَ بِهِۦ وَيَغْفِرُ مَا دُونَ ذَٰلِكَ
لِمَن يَشَآءُ ۚ وَمَن يُشْرِكْ بِٱللَّهِ فَقَدِ ٱفْتَرَىٰٓ إِثْمًا
عَظِيمًا ﴿٤٨﴾

48. Eebe ma dhaafo in lala wadaajiyo wuxuuse ka dhaafaa waxaa wixii ka soo hadhay Cidduu doono, Ruuxii la wadaajiyo Eebe wuxuu beenabuurtay Dambi Weyn.

49. Ka warrama kuwa daahirin (amaani) Naftooda, Eebaa Daahiriya Cidduu doono lagamana Dulmiyo waxa ku dhaggan Jeex Laf Timireed (Wax yar).

أَلَمْ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ يُزَكُّونَ أَنفُسَهُم بَلِ ٱللَّهُ يُزَكِّي
مَن يَشَآءُ وَلَا يُظْلَمُونَ فَتِيلًا ﴿٤٩﴾

50. Day siday ugu Been Abuuran Eebe isagaa ugu filan Dambi Cad.

ٱنظُرْ كَيْفَ يَفْتَرُونَ عَلَى ٱللَّهِ ٱلْكَذِبَ وَكَفَىٰ بِهِۦٓ
إِثْمًا مُّبِينًا ﴿٥٠﴾

51. Ka warran kuwa la siiyey qayb Kitaabka ah oo rumeyn Sixir iyo Shaydaan, una dhihi kuwa Gaaloobay kuwaasaa ka hanuunsan (Toosan) Kuwa Rumeeyey Jidkooda.

أَلَمْ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ نَصِيبًا
مِّنَ ٱلْكِتَٰبِ يُؤْمِنُونَ بِٱلْجِبْتِ وَٱلطَّٰغُوتِ
وَيَقُولُونَ لِلَّذِينَ كَفَرُوا۟ هَٰٓؤُلَآءِ أَهْدَىٰ مِنَ ٱلَّذِينَ
ءَامَنُوا۟ سَبِيلًا ﴿٥١﴾

52. Kuwaas waa kuwuu Nacladay Eebe, Cid Eebe Nacladayna uma heshid Gargaare.

أُو۟لَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ لَعَنَهُمُ ٱللَّهُ وَمَن يَلْعَنِ ٱللَّهُ فَلَن تَجِدَ
لَهُۥ نَصِيرًا ﴿٥٢﴾

Waxaase loogu yeedhi Gaalada Ehelu Kitaabka ah inay rumeeyaan Quraanka Rumeeyey Kutubtii hore intaan Eebe Doorinin, ama Nacladin siduu u Nacladay kuwii Sabtida dambaabay eeYuhuudeed. Eebana waa ka dhaafaa Dadka waxaan Gaalnimo ahayn, Gaalnimose waa Dambi weyn, mana aha inay is amaanaan, Eebaa og Cidda ammaan mudane, Been abuurasho, Xumaan iyo Shaydaan la rumeeyo, iyo Sheegasho ka Toosnaanta Muslimiinta waxay Sabab u tahay Naclad, wax u gargaarana ma helaan. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Dulmigu waa Saddex, midkood ma dhaafo Eebe, midna wuu Dhaafaa, midna kama tago, kuusan dhaafayn waa Gaalnimada, kuu dhaafi waa Dambiga kale, kuusan ka tagayna waa is dulminta Dadka qaarkood qaar ilaa isaga Abaal mariyo. Waxaa wariyey (Bukhaari iyo Muslim). An-Nisaa' (47-52).

---

53. Mise waxay leeyihiin Qayb Xukunka oo markaas ayan siinayn Dadka Laf Timir Duleelkeed (wax buuxiya).

أَمْ لَهُمْ نَصِيبٌ مِّنَ ٱلْمُلْكِ فَإِذًا لَّا يُؤْتُونَ ٱلنَّاسَ
نَقِيرًا ﴿٥٣﴾

54. Mise waxay ku Xasdi Dadka waxa Eebe Siiyey oo Fadli ah, waxaan Siinay Ehelkii Ibraahiim Kitaabka iyo Xigmad, waxaana siinay Xukun Wayn.

أَمْ يَحْسُدُونَ ٱلنَّاسَ عَلَىٰ مَآ ءَاتَىٰهُمُ ٱللَّهُ مِن فَضْلِهِۦ
فَقَدْ ءَاتَيْنَآ ءَالَ إِبْرَٰهِيمَ ٱلْكِتَٰبَ وَٱلْحِكْمَةَ
وَءَاتَيْنَٰهُم مُّلْكًا عَظِيمًا ﴿٥٤﴾

55. Waxaase ka mid noqday mid Rumeeya (Xaqa) waxaana ka mid ah mid ka Jeediya Xaqa, waxaa ugu Filan Jahannamo Gubid.

فَمِنْهُم مَّنْ ءَامَنَ بِهِۦ وَمِنْهُم مَّن صَدَّ عَنْهُ وَكَفَىٰ
بِجَهَنَّمَ سَعِيرًا ﴿٥٥﴾

56. Kuwii ka Gaaloobay Aayaadkanaga waxaanu Galin Naarta, mar kas-

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا سَوْفَ نُصْلِيهِمْ نَارًا كُلَّمَا

toos gubto Haragoodu waxaan ku badalnaa harko kale si ay u Dhadhamiyaan Cadaabka, Eebana waa Adkaade Falsan.

نَضِجَتْ جُلُودُهُم بَدَّلْنَٰهُمْ جُلُودًا غَيْرَهَا لِيَذُوقُوا۟
ٱلْعَذَابَ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَزِيزًا حَكِيمًا ﴿٥٦﴾

57. Kuwa Rumeeyey (Xaqa) oo falay Camal Fiican waxaan galinaynaa Jannooyin ay Dareeri Dhexdeeda Wabiyaal, oyna ku waari Dhexdeeda Waligood, waxayna ku mudan Haween la Daahiriyey waxaana Galinaynaa Hoos Fiican.

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ سَنُدْخِلُهُمْ
جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدًا ۖ
لَّهُمْ فِيهَآ أَزْوَٰجٌ مُّطَهَّرَةٌ ۖ وَنُدْخِلُهُمْ ظِلًّا
ظَلِيلًا ﴿٥٧﴾

**Aayaduhu waxay Caddayn Xasadka Yuhuud iyo inayna u ogolayn Muslimiinta Wanaag iyo Khayr siddii iyagoo Awoodda wax ku leh, Eebe Cidduu Doono yuu siiyaa Kitaab iyo Xigmad iyo Xukun, Ciddii Xaqa rumeysa iyo tii ka Jeedsatana waa uun laga abaalmarin, kuwa Gaaloobana oo Beeniya Aayaadka Eebe waxay Gali Naar Gubi Jidhkooda markastoy gubatana lagu badali mid kale si ay u dhadhamiyaan Cadaabka, kuwa Xaqa Rumeeyeyna oo Camal fiican fala waxay Gali Janno oy ku waari oo wanaagsan. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Jannada waxaa ku yaal Geed uu Socon Hooskeeda mid saaran Gaadiid Boqol Sano oosan Goynayn. (waa Saxiix). An-Nisaa' (53-57).**

---

58. Eebe wuxuu idin Fari inaad u Gudaan (siisaan) Amaanada Ehelkeeda, (Ciddeeda) haddaad kala Xukumaysaan Dadkana inaad ku kala Xukuntaan Caddaalad, Eebe waxaa Wanaagsan wuu idinku waanin Eebana waa Maqle Arka.

۞ إِنَّ ٱللَّهَ يَأْمُرُكُمْ أَن تُؤَدُّوا۟ ٱلْأَمَٰنَٰتِ إِلَىٰٓ أَهْلِهَا
وَإِذَا حَكَمْتُم بَيْنَ ٱلنَّاسِ أَن تَحْكُمُوا۟ بِٱلْعَدْلِ ۚ إِنَّ
ٱللَّهَ نِعِمَّا يَعِظُكُم بِهِۦٓ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ سَمِيعًۢا بَصِيرًا ﴿٥٨﴾

59. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow Adeeca Eebe oo Adeeca Rasuulka iyo kuwa Amarka leh, oo idinka mid ah, haddaad ku Dooddaan Arrin u Celiya Eebe iyo Rasuulka haddaad tihiin kuwo Rumeeyey Eebe iyo Maalinta Dambe (Qiyaamada) saasaana khayr roon oo Wanaag badan Xagga Abaalmarinta.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ أَطِيعُوا۟ ٱللَّهَ وَأَطِيعُوا۟ ٱلرَّسُولَ وَأُو۟لِى
ٱلْأَمْرِ مِنكُمْ ۖ فَإِن تَنَٰزَعْتُمْ فِى شَىْءٍ فَرُدُّوهُ إِلَى ٱللَّهِ
وَٱلرَّسُولِ إِن كُنتُمْ تُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ ۚ ذَٰلِكَ
خَيْرٌ وَأَحْسَنُ تَأْوِيلًا ﴿٥٩﴾

60. Ka warran kuwa Sheegan inay rumeeyeen waxa lagugu soo dejiyey iyo waxa lagu Dejiyey kuwii kaa horreeyay oo ku Xukuntami Shaydaan, iyagoo la faray inay diidaan, wuxuuna dooni Shaydaanku inuu Baadiyeeyo Baadi Fog.

أَلَمْ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ يَزْعُمُونَ أَنَّهُمْ ءَامَنُوا۟ بِمَآ
أُنزِلَ إِلَيْكَ وَمَآ أُنزِلَ مِن قَبْلِكَ يُرِيدُونَ أَن
يَتَحَاكَمُوٓا۟ إِلَى ٱلطَّٰغُوتِ وَقَدْ أُمِرُوٓا۟ أَن
يَكْفُرُوا۟ بِهِۦ وَيُرِيدُ ٱلشَّيْطَٰنُ أَن يُضِلَّهُمْ
ضَلَٰلًۢا بَعِيدًا ﴿٦٠﴾

61. Marka lagu dhaho u kaalaya wuxuu Soo Dejiyey Eebe iyo xagga Rasuulka waxaad Arkaysaa Munaafiqiinta oo kaa Jeedsan jeedsasho.

وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ تَعَالَوْا إِلَىٰ مَا أَنزَلَ اللَّهُ وَإِلَى
الرَّسُولِ رَأَيْتَ الْمُنَافِقِينَ يَصُدُّونَ عَنكَ
صُدُودًا ﴿٦١﴾

**Amaanadoo la dhawro loona Celiyo Cideeda iyo Caddaaladda Dadka lagu Maamulo laguna kala Xukumo waa waxyaalaha waawayn oy Diinta Islaamku fari Sidoo kale Eeboo la adeeco iyo Rasuulka iyo kuwa Xaqa wax ku hogaamin oo Culimada iyo Xaakimka Muslimiinta ah, wixii Dood ahna loo celiyo Eebe iyo Rasuulkiisa saasaana Wanaagbadan, kuwa Munaafiqiinta ah oo dooni inay Shaydaan iyo wax leexsan isku xukumaan oo ka baxsan Quraanka iyo Islaamka kuwaas Shaydaan baa Dhumiyey, marka Quraanka iyo Rasuulka loogu yeedhana way Jeedsadaan. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Adeeciddu waa uun waxa fiican. markalana wuxuu yidhi: Layskuma Adeeco Xumaan. Taasoo ah in khayrka laysku maqlo, waxa Xunse laysku raacin. An-Nisaa' (58-61).**

---

62. Say noqon markay ku Dhacdo Musiibo (dhibaato) waxay hor marsadeen Gacmahoodu Darteed, markaas ay kuu yimaadaan iyagoo ku dhaaran Eebe inaanaan doonin waxaan Wanaag iyo Tawfiiq ahayn.

63. Kuwaasu waa kuwa Ogyahay Eebe waxa Quluubtooda ku Sugan ee ka Jeedso Xaggooda waanina waxaadna u dhahdaa Naftooda Hadal xeel dheer.

64. Umaanaan dirin Rasuul in la Adeeco mooyee Idanka Eebe, hadday markay Dulmiyaan Naftooda ay kuu yimaadaan oy Dambi dhaaf waydiistaan Eebe una Dambi dhaaf waydiiyo Rasuulku waxay Eebe (ogaan) dambi dhaafe Naxariista.

65. Eebahaa baan ku dhaartaye ma rumeeyaan intay kugu Xukuntamaan waxa dhex mara oyna ka helin Naftooda dhib, waxaad Xukuntay ooy hogaansamaan hogaansi.

فَكَيْفَ إِذَا أَصَابَتْهُم مُّصِيبَةٌ بِمَا قَدَّمَتْ
أَيْدِيهِمْ ثُمَّ جَاءُوكَ يَحْلِفُونَ بِاللَّهِ إِنْ أَرَدْنَا
إِلَّا إِحْسَانًا وَتَوْفِيقًا ﴿٦٢﴾
أُولَٰئِكَ الَّذِينَ يَعْلَمُ اللَّهُ مَا فِي قُلُوبِهِمْ
فَأَعْرِضْ عَنْهُمْ وَعِظْهُمْ وَقُل لَّهُمْ فِي
أَنفُسِهِمْ قَوْلًا بَلِيغًا ﴿٦٣﴾
وَمَا أَرْسَلْنَا مِن رَّسُولٍ إِلَّا لِيُطَاعَ بِإِذْنِ
اللَّهِ وَلَوْ أَنَّهُمْ إِذ ظَّلَمُوا أَنفُسَهُمْ جَاءُوكَ
فَاسْتَغْفَرُوا اللَّهَ وَاسْتَغْفَرَ لَهُمُ الرَّسُولُ
لَوَجَدُوا اللَّهَ تَوَّابًا رَّحِيمًا ﴿٦٤﴾
فَلَا وَرَبِّكَ لَا يُؤْمِنُونَ حَتَّىٰ يُحَكِّمُوكَ فِيمَا
شَجَرَ بَيْنَهُمْ ثُمَّ لَا يَجِدُوا فِي أَنفُسِهِمْ
حَرَجًا مِّمَّا قَضَيْتَ وَيُسَلِّمُوا تَسْلِيمًا ﴿٦٥﴾

**Waxaa ka mid ahayd Caadada Munaafiqiinta inay dhib iyo Xumaan ula Joogaan Nabiga iyo Mu'miniinta, markay Musiibo ku dhacdana ay Nabiga u yimaadaan iyagoo ku dhaaran Eebe inayan waxaan Wanaag ahayn rabin, Eebena waa Ogyahay waxa Quluubtooda ku Sugan ee waa in la waaniyo oo laga Jeedsado.**
**Nabiyadana waxaa loo diray in lagu Adeeco idanka Eebe, Hadaadse Toobad keentaan oo Xaqa u noqotaan Eebe waa u Dhaafi lahaa, Xaqana ma rumeeyaan intay uga hogaansamaan Xukunka Rasuulka wax dhib ahna ayna ka helin. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Eebaan ku Dhaartaye Midkiin ma Rumeeyo intuu ka raaco waxaan la imid. An-Nisaa' (62-65).**

66. Haddaan ku Faral yeello korkooda Dila Naftiinna ama ka baxa Guryihiinna ma Faleen wax yar oo ka mid ah mooyee, hadday Falaan waxa lagu waanin yaa u Khayr roon kuna daran (adag) sugnaan (Rumeyn).

وَلَوْ أَنَّا كَتَبْنَا عَلَيْهِمْ أَنِ اقْتُلُوا أَنفُسَكُمْ
أَوِ اخْرُجُوا مِن دِيَارِكُم مَّا فَعَلُوهُ إِلَّا قَلِيلٌ مِّنْهُمْ
وَلَوْ أَنَّهُمْ فَعَلُوا مَا يُوعَظُونَ بِهِ لَكَانَ خَيْرًا لَّهُمْ
وَأَشَدَّ تَثْبِيتًا ﴿٦٦﴾

67. Markaasaan ka siin lahayn Agtanada Ajir wayn.

وَإِذًا لَّآتَيْنَاهُم مِّن لَّدُنَّا أَجْرًا عَظِيمًا ﴿٦٧﴾

68. waxaana ku hanuunin lahayn Jid Toosan.

وَلَهَدَيْنَاهُمْ صِرَاطًا مُّسْتَقِيمًا ﴿٦٨﴾

69. Ciddii Adeeca Eebe iyo Rasuulka kuwaasu waxay ahaan lajirka kuwuu u nicmeeyey Eebe, oo Nabiyada, Rumeeyayaasha, Shuhadada iyo kuwa Suubban waxaana u fiican rafiiq kuwaas.

وَمَن يُطِعِ اللَّهَ وَالرَّسُولَ فَأُولَٰئِكَ مَعَ الَّذِينَ أَنْعَمَ
اللَّهُ عَلَيْهِم مِّنَ النَّبِيِّينَ وَالصِّدِّيقِينَ وَالشُّهَدَاءِ
وَالصَّالِحِينَ ۚ وَحَسُنَ أُولَٰئِكَ رَفِيقًا ﴿٦٩﴾

70. Arrintaasuna waa Fadliga Eebe waxaana ku Filan Eebe Ogaansho.

ذَٰلِكَ الْفَضْلُ مِنَ اللَّهِ ۚ وَكَفَىٰ بِاللَّهِ
عَلِيمًا ﴿٧٠﴾

Wuxuu ka Warrami Eebe in haddii Dadka Badankiis la faro inay Falaan waxay sameyn oo Xumaan ah ma ayan yeeleen, wax yar mooyee, waxaase fiican inay maqlaan waxa lagu waanin, markaasuu Eebe siin lahaa Ajir wayn, Toosinna lahaa Ciddii Eebe Adeecda iyo Rasuulka wuxuu Jannada la gali kuwa Eebe U nicmeeyey oo ah Nabiyada, Rumeeyayaasha, Shuhadada iyo kuwa Suuban, waana Wehelka u fiican, arrintaasuna waa Fadliga Eebe isagaana ku filan Ogaade.
Rabiico Binu Kacab waxaa laga wariyey inuu Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ku yidhi: wax warso, markaasuu yidhi waxaan rabaa inaan kugula Rafiiqo Jannada, markaasuu yidhi waxaas waxaan ahayna'wuxuuna yidhi waa intaas, markaasuu yidhi (iigu kaalmee Naftaada Badinta Sujuudda. Waxaa wariyey (Muslim).
Taasina waxay ku tusin inay lagama maarmaan tahay in la Camal Falo, laguna Dadaalo Khayrka iyo Wanaagga si loo Haleelo kuwa Fiican. An-Nisaa' (66-70).

---

71. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow Qaata Digtoonidiinna Duulana idinkoo Koox Koox ah, ama Duula Dhamaan.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا خُذُوا حِذْرَكُمْ
فَانفِرُوا ثُبَاتٍ أَوِ انفِرُوا جَمِيعًا ﴿٧١﴾

72. Waxaa idinka mid ah (Munaafiqiin) Cabsiin (Dib marin) hadday idinku dhacdo Musiibo (dhibaato) wuxuu dhahaa waxaa ii Nicmeeyey Eebe korkayga haddaanan la joogin.

وَإِنَّ مِنكُمْ لَمَن لَّيُبَطِّئَنَّ فَإِنْ أَصَابَتْكُم مُّصِيبَةٌ
قَالَ قَدْ أَنْعَمَ اللَّهُ عَلَيَّ إِذْ لَمْ أَكُن مَّعَهُمْ شَهِيدًا ﴿٧٢﴾

73. Hadduu idin soo gaadho (Heshaan) Fadli Eebe (Khayr) wuxuu dhihi sidii isagoo ayna ahayn dhexdiinna Je-

وَلَئِنْ أَصَابَكُمْ فَضْلٌ مِّنَ اللَّهِ لَيَقُولَنَّ كَأَن
لَّمْ تَكُن بَيْنَكُمْ وَبَيْنَهُ مَوَدَّةٌ يَا لَيْتَنِي كُنتُ

مَعَهُمْ فَأَفُوزَ فَوْزًا عَظِيمًا ﴿٧٣﴾

ceyl Shallaaytee maxaan ula Joogi waayay, oon Liibaano Liibaan wayne.

۞ فَلْيُقَاتِلْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ الَّذِينَ
يَشْرُونَ الْحَيَاةَ الدُّنْيَا بِالْآخِرَةِ ۚ
وَمَن يُقَاتِلْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ فَيُقْتَلْ أَوْ يَغْلِبْ
فَسَوْفَ نُؤْتِيهِ أَجْرًا عَظِيمًا ﴿٧٤﴾

74. Ha kula Dagaallameen Jidka Eebe kuwa ku Gatay Nolasha Dhaw Aakhiro (doorta Adduun) Ruuxii ku dagaalama Jidka Eebe oo la Dilo ama Adkaada waxaan Siinaynaa Ajir wayn.

Jahaadku iyo meel marinta Xaqa iyo Difaaca Diinta iyo Dalka Islaamka waa Waajib Sugan, iyadoo laga wada qayb qaadan, waxaase Jira kuwo Munaafiqiin ah oo Dadka cabsi galin, marka dhib dhacana yidhaahda Eebaan i raacinin, marka Guul la helana yidhaahda maxaan ula joogi waayay.
Waxayna ku tusin Aayaddu Wanaagga Eebe u darbay Cidda lagu Dilo Jahaadka ama Adkaata, taasoo ku tusin inaan laga adkaanayn Muslimiinta markay kulmistaan iimaan dhab ah, isku Duubni iyo u Darbasho, hase yeeshee markay Xaqa ka leexdaan oo kala tagaan sida muuqata ayaamahan waxaa ku Dhiirran Cadawgooda oo ka Adkaan, waase inay is gaadhaan intay Goori Goortahay. An-Nisaa'(71-74).

---

وَمَا لَكُمْ لَا تُقَاتِلُونَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَالْمُسْتَضْعَفِينَ
مِنَ الرِّجَالِ وَالنِّسَاءِ وَالْوِلْدَانِ الَّذِينَ يَقُولُونَ رَبَّنَا
أَخْرِجْنَا مِنْ هَٰذِهِ الْقَرْيَةِ الظَّالِمِ أَهْلُهَا وَاجْعَل لَّنَا
مِن لَّدُنكَ وَلِيًّا وَاجْعَل لَّنَا مِن لَّدُنكَ نَصِيرًا ﴿٧٥﴾

75. Maxaad leedihiin ood ugu Dagaalami waydeen Jidka Eebe, iyagoo kuwa la Daciifsan (Tabarta yaraa) oo rag iyo Haween iyo Caruurba ay leeyihiin Eebow naga Bixi Magaaladan Daalimiinta ah Ehelkeedu noogana yeel agtaada Wali iyo gargaare.

الَّذِينَ آمَنُوا يُقَاتِلُونَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ ۖ وَالَّذِينَ كَفَرُوا
يُقَاتِلُونَ فِي سَبِيلِ الطَّاغُوتِ فَقَاتِلُوا أَوْلِيَاءَ
الشَّيْطَانِ ۖ إِنَّ كَيْدَ الشَّيْطَانِ كَانَ ضَعِيفًا ﴿٧٦﴾

76. kuwa (Xaqa) rumeeyey waxay ku Dagaallami Jidka Eebe, kuwa Gaaloobayna waxay ku Dagaallami Jidka Shaydaanka, ee la dagaallama Sokeeyaha Shaydaanku dhagarta Shaydaanku waa tabar yaryahaye.

أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ قِيلَ لَهُمْ كُفُّوا أَيْدِيَكُمْ وَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ
وَآتُوا الزَّكَاةَ فَلَمَّا كُتِبَ عَلَيْهِمُ الْقِتَالُ إِذَا فَرِيقٌ
مِّنْهُمْ يَخْشَوْنَ النَّاسَ كَخَشْيَةِ اللَّهِ أَوْ أَشَدَّ خَشْيَةً ۚ
وَقَالُوا رَبَّنَا لِمَ كَتَبْتَ عَلَيْنَا الْقِتَالَ لَوْلَا أَخَّرْتَنَا
إِلَىٰ أَجَلٍ قَرِيبٍ ۗ قُلْ مَتَاعُ الدُّنْيَا قَلِيلٌ وَالْآخِرَةُ

77. Ka warran kuwa loo yidhi Reeba Gacmihiinna (Billoowgii Islaamka) Oogana Salaadda, Bixiyana Zakada markii lagu Faral yeelay Dagaalkana waxaa soo baxay Koox ka mid ah oo uga Cabsan Dadka Cabsida Eebe oo kale ama ka daran Cabsi, waxayna dhaheen Eebow maxaad noogu Faral yeeshay Dagaalka, maxaad Dib noogu dhigi wayday Tan iyo Muddo dhaw,

waxaad dhahdaa Raaxada Adduunyo waa yartahay, Aakhiraana u khayroon Ciddii Dhawrsan Laydinkama dulmiyo Fatiil oo kale (wax yar).

خَيْرٌ لِّمَنِ اتَّقَىٰ وَلَا تُظْلَمُونَ فَتِيلًا ﴿٧٧﴾

Aayaduhu waxay ku Boorrin Muslimiinta inay Jahaadaan oo Dagaallamaan mar hadday Muslimiin Rag, Haween iyo Carruurba leh oo tabar yar jiraan lana Dullayn, Dagaalkuna waa mid Xaq ah oo Dar Eebe ah iyo mid Xaq darro oo Jid Shaydaan ah, waana in lala Dagaalamo Gargaaraha Shaydaanka, waana tabar yar yahay, mana aha in lagu Dagdago Dagaalka ee waa in Cibaadada la Badiyo lana Adkaysto Jahaadka Cabsida Dhabta ahna laga Cabsadaa Eebe, lana ogaado inay nolosha Adduun tahay wax yar oo Tagi.
Xasan Basri wuxuu yidhi: Eebe ha u Naxariisto Addoon kula Noolaaday Adduunyada Qadarkeeda, Adduunyana ma aha Bilowgeed iyo Dhammaadkeed waxaan ahayn Ruux Seexday oo ku arkay Hurdada wuxuu Jecelyahay soona Baraarugay. An-Nisaa' (75-77).

---

78. Meejaad ahaataanba wuu idin haleeli Mawdku (Geeridu) aad ahaateenba Daaro Dheerdheer oo la adkeeyey, hadday taabato wanaag waxay dhahaan tani waxay ka timid Xaga Eebe, hadday ku dhacdo Xumaanna waxay dhahaan tani waxay ka timid Agtaada (Nabiga) waxaad dhahdaa Dhammaan waxay ka ahaadeen Eebe Agtiisa, maxaa u sugnaaday Qoomkaas uma dhawa inay Fahmaan Hadale.

أَيْنَمَا تَكُونُوا يُدْرِككُّمُ الْمَوْتُ وَلَوْ كُنتُمْ فِي بُرُوجٍ
مُّشَيَّدَةٍ ۗ وَإِن تُصِبْهُمْ حَسَنَةٌ يَقُولُوا هَٰذِهِ مِنْ عِندِ
اللَّهِ ۖ وَإِن تُصِبْهُمْ سَيِّئَةٌ يَقُولُوا هَٰذِهِ مِنْ عِندِكَ ۚ
قُلْ كُلٌّ مِّنْ عِندِ اللَّهِ ۖ فَمَالِ هَٰؤُلَاءِ الْقَوْمِ لَا يَكَادُونَ
يَفْقَهُونَ حَدِيثًا ﴿٧٨﴾

79. Wixii ku soo gaadha oo Wanaaga waxay ka ahaadeen Eebe, wixii kugu dhaca oo Xumaan ahna waxay ka ahaatay Naftaada, waana kuu Diray Dadka adoo Rasuul ah, wuuna ku Filanyahay Eebe Marag.

مَّا أَصَابَكَ مِنْ حَسَنَةٍ فَمِنَ اللَّهِ ۖ وَمَا أَصَابَكَ مِن سَيِّئَةٍ
فَمِن نَّفْسِكَ ۚ وَأَرْسَلْنَاكَ لِلنَّاسِ رَسُولًا ۚ وَكَفَىٰ بِاللَّهِ
شَهِيدًا ﴿٧٩﴾

80. Ruuxii adeeca Rasuulka wuxuu Dhab u Adeecay Eebe, Ruuxii Jeedsadana kuugu maanaan dirin Ilaaliye.

مَّن يُطِعِ الرَّسُولَ فَقَدْ أَطَاعَ اللَّهَ ۖ وَمَن تَوَلَّىٰ
فَمَا أَرْسَلْنَاكَ عَلَيْهِمْ حَفِيظًا ﴿٨٠﴾

81. Waxay dhihi (Munaafiqiintu) Daacad (baan nahay) markay ka tagaan Agtaadana waxay maamulaan (Habeenkii) Koox ka mid ah waxay leedahay waxaan ahayn, Eebana wuu Qori waxay Maamuli (miri) ee Ka jeed-

وَيَقُولُونَ طَاعَةٌ فَإِذَا بَرَزُوا مِنْ عِندِكَ بَيَّتَ
طَائِفَةٌ مِّنْهُمْ غَيْرَ الَّذِي تَقُولُ ۖ وَاللَّهُ يَكْتُبُ
مَا يُبَيِّتُونَ ۖ فَأَعْرِضْ عَنْهُمْ وَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ ۚ وَكَفَىٰ

so Xaggooda talana saaro Eebe, waxaana ku filan Wakiil Eebe.

بِٱللَّهِ وَكِيلًا ﴿٨١﴾

Meel kastoo la joogo waa la dhiman si kasta ha laysu ILaaliyo ama Guryo adag ha la galee, wax kastana waxay ku hoos jiraan Awoodda Eebe ee ma aha in Gaaladu Xumaanta iyo Musiibada u tiiriyaan Nabiga, waxaase jirta in Dadka laga Abaal mariyo waxay kasbadeen khayr iyo Sharba.
Rasuulkana wuxuu Eebe u diray Dadka, Eebaase Wakiil ilaaliye ah ugu Filan Dadka. Ruuxii Adeeca oo Raaca Rasuulka wuxuu adeecay Eebe, Ruuxii Jeedsadase waxba Nabiga kama saarra, waana Munaafaqnimo in la muujisto Xaqrumayn, markii la fogaadana la diido Xaqa oo wax kale la falo, Eebaase arka kuwaas oo Abaal marin. An-Nisaa' (78-81).

---

82. Miyeyna Fiirfiirinayn Quraanka, hadduu ka yimid Eebe Agtiisa Meelaan ahayn waxay ka heli lahaayeen dhexdiisa is khilaaf badan.

أَفَلَا يَتَدَبَّرُونَ ٱلْقُرْءَانَ ۚ وَلَوْ كَانَ مِنْ عِندِ غَيْرِ ٱللَّهِ
لَوَجَدُوا۟ فِيهِ ٱخْتِلَٰفًا كَثِيرًا ﴿٨٢﴾

83. markuu u yimaaddo amar Nabadgalya ah ama Cabsi way Faafiyaan hadday u Celiyaan Xagga Rasuulka ama kuwa cilmiga Leh oo ka mid ah waxaa ogaan lahaa kuwa la soo baxa (Dhabta) oo ka mid ah, hadduusan jirin Fadliga Eebee korkiinna iyo Naxariistiisa waad raaci lahaydeen Shaydaan wax yar mooyee.

وَإِذَا جَآءَهُمْ أَمْرٌ مِّنَ ٱلْأَمْنِ أَوِ ٱلْخَوْفِ
أَذَاعُوا۟ بِهِۦ ۖ وَلَوْ رَدُّوهُ إِلَى ٱلرَّسُولِ وَإِلَىٰٓ أُو۟لِى
ٱلْأَمْرِ مِنْهُمْ لَعَلِمَهُ ٱلَّذِينَ يَسْتَنۢبِطُونَهُۥ مِنْهُمْ ۗ
وَلَوْلَا فَضْلُ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُۥ لَٱتَّبَعْتُمُ
ٱلشَّيْطَٰنَ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٨٣﴾

84. Ee ku Dagaallan Jidka Eebe lama mashaqayn Naftaada mooyee, kuna boorri Mu'miniinta (Dagaalka) wuxuu u dhawyahay Eebe inuu idinka reebo dhibka kuwa Gaaloobay, Eebaana daran dhib daranna Xanuujin.

فَقَٰتِلْ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ لَا تُكَلَّفُ إِلَّا نَفْسَكَ ۚ وَحَرِّضِ
ٱلْمُؤْمِنِينَ ۖ عَسَى ٱللَّهُ أَن يَكُفَّ بَأْسَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ ۚ
وَٱللَّهُ أَشَدُّ بَأْسًا وَأَشَدُّ تَنكِيلًا ﴿٨٤﴾

85. Ruuxii Shafeeca shafeeco Wanaagsan waxaa u ahaada Qayb ka mid ah, Ruuxiise Shaafeeca Shafeeco Xun waxaa u ahaan Dambi ka mid ah, Eebaana wax kasta ILaaliya.

مَّن يَشْفَعْ شَفَٰعَةً حَسَنَةً يَكُن لَّهُۥ نَصِيبٌ مِّنْهَا ۖ
وَمَن يَشْفَعْ شَفَٰعَةً سَيِّئَةً يَكُن لَّهُۥ كِفْلٌ مِّنْهَا ۗ
وَكَانَ ٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ مُّقِيتًا ﴿٨٥﴾

Wuxuu farayaa Eebe in Quraanka si Fiican loo Fiiriyo, lana kaso Macnihiisa, illeen Xagga Eebuu ka ahaadaye, wax is burin ahna kuma jirto sida hadalada kale, markay arrin muhiim ah soo daristana waxaa Eebe faray in loo celiyo Rasuulka iyo kuwa u cilmileh, Shaydaanna laga Digtoonaado, Jidka Eebana lagu Jahaado, Cidwalbana waxay la kulmi Shafeecadeeda abaalkeedii Samaan iyo Xumaanba. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Waxaa uun halaagay ummadihii idin ka horreeyay isku Khilaafkii Kitaabkoodii. Markalana wuxuu yidhi: Waxaa ugu filan Ruux Been inuu ka sheekeeyo wuxuu Maqlay oo Dhan. An-Nisaa' (82-85).

86. Haddii laydin Salaamo Salaan ku Salaama mid ka Fiican ama ku celiya (mid la mid ah) Eebana waa wax kasta Xisaabiye (Kaafiye).

وَإِذَا حُيِّيتُم بِتَحِيَّةٍ فَحَيُّوا بِأَحْسَنَ مِنْهَا أَوْ رُدُّوهَا ۗ
إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ حَسِيبًا ﴿٨٦﴾

87. Eebe ILaah (kale) ma jiro isaga mooyee wuuna idiin soo kulmin Maalinta Qiyaame, shaki ma leh, yaa ka run badan Eebe Hadal (ma jiro).

اللَّهُ لَا إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ۚ لَيَجْمَعَنَّكُمْ إِلَىٰ يَوْمِ الْقِيَامَةِ
لَا رَيْبَ فِيهِ ۗ وَمَنْ أَصْدَقُ مِنَ اللَّهِ حَدِيثًا ﴿٨٧﴾

88. Maxaad leedihiin (Mu'miniinta) ood Munaafiqiinta laba Kooxood ugu Noqoteen (in la laayo iyo in kale) Eebe wuu Halaagay (oo celiyey) waxay kasbadeen dartiis, ma waxaad doonaysaan inaad Hanuunisaan Cidduu dhumiyey Eebe, Ruuxuu dhumiyo Eebana uma heshid Waddo (Hanuun).

۞ فَمَا لَكُمْ فِي الْمُنَافِقِينَ فِئَتَيْنِ وَاللَّهُ أَرْكَسَهُم
بِمَا كَسَبُوا ۚ أَتُرِيدُونَ أَن تَهْدُوا مَنْ أَضَلَّ اللَّهُ ۖ
وَمَن يُضْلِلِ اللَّهُ فَلَن تَجِدَ لَهُ سَبِيلًا ﴿٨٨﴾

89. Waxay jecelyihiin (Munaafiqiintu) inaad Gaaloowdaan siday u Gaaloobeen ood isku mid noqotaan, ha ka yeelanina Xaggooda Sokeeye intay uga hijroodaan Jidka Eebe, haddayse Jeedsadaan qabta oo ku dila Meejaad ka heshaanba, hana ka yeelanina Xaggooda Sokeeye iyo Gargaare (Midna).

وَدُّوا لَوْ تَكْفُرُونَ كَمَا كَفَرُوا فَتَكُونُونَ سَوَاءً ۖ فَلَا
تَتَّخِذُوا مِنْهُمْ أَوْلِيَاءَ حَتَّىٰ يُهَاجِرُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ ۚ
فَإِن تَوَلَّوْا فَخُذُوهُمْ وَاقْتُلُوهُمْ حَيْثُ
وَجَدتُّمُوهُمْ ۖ وَلَا تَتَّخِذُوا مِنْهُمْ وَلِيًّا
وَلَا نَصِيرًا ﴿٨٩﴾

90. Kuwa Gaadhi Qoom dhexdiinna iyo dhexdooda ballan (heshiis) yahay mooyee, ama idiin yimid iyadow Cidhiidhyantahay Laabtoodu inay idinla Dagaallamaan ama la dagaallamaan Qoomkooda, hadduu doono Eebe wuu idinku diri lahaa wayna idin la dagaallami lahaayeen haddayse idinka dheeraadaan oyan idin la Dagaallamin oy idiin soo hormariyaanNabadgalyo idiin ma yeelin Eebe korkooda Jid (Xaq kuma lihidiin Dagaal).

إِلَّا الَّذِينَ يَصِلُونَ إِلَىٰ قَوْمٍ بَيْنَكُمْ وَبَيْنَهُم مِّيثَاقٌ
أَوْ جَاءُوكُمْ حَصِرَتْ صُدُورُهُمْ أَن يُقَاتِلُوكُمْ
أَوْ يُقَاتِلُوا قَوْمَهُمْ ۚ وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ لَسَلَّطَهُمْ عَلَيْكُمْ
فَلَقَاتَلُوكُمْ ۚ فَإِنِ اعْتَزَلُوكُمْ فَلَمْ يُقَاتِلُوكُمْ وَأَلْقَوْا
إِلَيْكُمُ السَّلَمَ فَمَا جَعَلَ اللَّهُ لَكُمْ عَلَيْهِمْ سَبِيلًا ﴿٩٠﴾

Salaantu waa Calaamadda Muslimiinta, Ruuxii ku Salaamana waa inaad u Celisaa mid ka Fiican ama la mid ah. Qiyaamana waa la kulmi, Eebana waa run badane, mana aha in Gaalada lala kala safto ama laysku Khilaafo Xaalkooda, iyaguba waxay jecelyihiin in Muslimiintu Gaalowdo siday iyagu u Gaaloobeen, hana ka yeelanina Sokeeye iyo Gargaare midna, kuwiise la nool kuwo aad ballan leedihiin ama idinla dagaallamin Nabad galiya, Ciddii idin Nabad galisa Nabad galiya, tii idinla Col ahna la dagaallama, waana taas Caddaaladda iyo Wanaagga Islaamku Dagaallan ma Jecla. An-Nisaa' (86-90).

91. Waxaad helaysaan kuwa kale oo dooni inay idin nabadgaliyaan, oo nabadgaliyaan Qoomkooda (daahirka) markastoo loo celiyo Gaalnimana waa lagu dedejiyaa dhexdiisa, haddayna idinka dheeraan ooyan idin siinin Nabadgalyo ooyan idinka reebin Gacmahooda qabta oo ku Dila meejaad ka heshaanba, kuwaasna waxaan idiinka yeellay Xujo Cad.

سَتَجِدُونَ ءَاخَرِينَ يُرِيدُونَ أَن يَأْمَنُوكُمْ وَيَأْمَنُوا۟
قَوْمَهُمْ كُلَّ مَا رُدُّوٓا۟ إِلَى ٱلْفِتْنَةِ أُرْكِسُوا۟ فِيهَا ۚ فَإِن
لَّمْ يَعْتَزِلُوكُمْ وَيُلْقُوٓا۟ إِلَيْكُمُ ٱلسَّلَمَ وَيَكُفُّوٓا۟ أَيْدِيَهُمْ
فَخُذُوهُمْ وَٱقْتُلُوهُمْ حَيْثُ ثَقِفْتُمُوهُمْ ۚ
وَأُو۟لَٰٓئِكُمْ جَعَلْنَا لَكُمْ عَلَيْهِمْ سُلْطَٰنًا مُّبِينًا ﴿٩١﴾

92. uma habboona (banaana) Ruux Mu'min ah inuu Dilo Mu'min si gaf ah mooyee, Ruuxii u Dila Mu'min Gaf waxaa saaran Xorayn qoor Mu'min, iyo Mag la siiyo Ehelkiisii, inay Sadaqaystaan moyee, hadduu ka midyahay Qoom aad Coltihiin isna Mu'min yahay waxaa Saaran Xorayn Qoor Mu'min, hadduu ka midyahay Qoom ballan idin dhexyaal waxaa saaran Mag la siiyo Ehelkiisii iyo Xorayn Qoor Mu'min ah, hadduusan helin (Qoorna) wuxuu Soomi Laba Bilood oo Israac raacsan, waana Toobad Eebe, Eebana waa Oge Falsan.

وَمَا كَانَ لِمُؤْمِنٍ أَن يَقْتُلَ مُؤْمِنًا إِلَّا خَطَـًٔا ۚ
وَمَن قَتَلَ مُؤْمِنًا خَطَـًٔا فَتَحْرِيرُ رَقَبَةٍ مُّؤْمِنَةٍ
وَدِيَةٌ مُّسَلَّمَةٌ إِلَىٰٓ أَهْلِهِۦٓ إِلَّآ أَن يَصَّدَّقُوا۟ ۚ
فَإِن كَانَ مِن قَوْمٍ عَدُوٍّ لَّكُمْ وَهُوَ مُؤْمِنٌ
فَتَحْرِيرُ رَقَبَةٍ مُّؤْمِنَةٍ ۖ وَإِن كَانَ
مِن قَوْمٍۭ بَيْنَكُمْ وَبَيْنَهُم مِّيثَٰقٌ فَدِيَةٌ
مُّسَلَّمَةٌ إِلَىٰٓ أَهْلِهِۦ وَتَحْرِيرُ رَقَبَةٍ مُّؤْمِنَةٍ ۖ
فَمَن لَّمْ يَجِدْ فَصِيَامُ شَهْرَيْنِ
مُتَتَابِعَيْنِ تَوْبَةً مِّنَ ٱللَّهِ ۗ وَكَانَ ٱللَّهُ
عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿٩٢﴾

93. Ruuxii u Dila Mu'min si Kas ah, Abaalkiisu waa Jahannamo oos ku Waari dhexdeeda, wuuna u Cadhoon Eebe wuuna Lacnadi wuxuu u darbi Cadaab wayn.

وَمَن يَقْتُلْ مُؤْمِنًا مُّتَعَمِّدًا فَجَزَآؤُهُۥ
جَهَنَّمُ خَٰلِدًا فِيهَا وَغَضِبَ ٱللَّهُ عَلَيْهِ
وَلَعَنَهُۥ وَأَعَدَّ لَهُۥ عَذَابًا عَظِيمًا ﴿٩٣﴾

Waxaa jirta Munaafiqiin ku Gabban Islaamka Jecelse Gaalnimada kuwaas haddayna Nabadgalinin Muslimiinta waa in layska celiyo.

Aayadaha kale waxay ka warrami inayan Banaanayn in Naf Mu'min loo Dilo Xaq darro, Ciddiise si gaf ah u disha waxaa saaran Xorayn Qoor iyo Mag la siiyo Ehelkiisa, haddii la waayana Soon laba Bilood oo is raac raacsan, waa Toobad Fiican, Ciddiise u kas u disha si Xaq darro ah Ruux Mu'min ah Abaalkiisu waa Jahannamoos ku waaro, Cadho iyo Lacnad Eebe iyo Cadaab wayn, maxaa yeelay ma fududa Nafta muslimku ee waa Qaali mana banaana in lagu xad gudbo. Waxaa sugnaatay Adduunkoo taga (Rogmada) yaa ka sahlan Eebe agtiisa Dil ruux Muslim ah, mar kalana wuxuu yidhi Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) hadday u kulmaan waxa Samaawaadka iyo Dhulka ku Sugan inay Dilaan Muslim wuxuu Eebe ku tuuri lahaa Naarta, taasina waxay ku tusin sida Islaamku u dhawray Xuquuqda Dadka iyo Noloshiisa, iyo qaalinimada iyo Sharafta Muslimka mar hadduu ka wayn yahay Adduunka oo dhan iyo waxa ku Sugan. An-Nisaa' (91-93).

94. Kuwa xaqa Rumeeyow markaad u Safartaan Jidka Eebe wax caddaysta (Hubsada) hana dhihina Ruux Salaan idiin soo gudbiyey ma tihid Mu'min idinkoo dooni Dhalanteedka Nolosha dhaw, Eebe agtiisa yey tahay qaniimooyin Badan, saasaad ahaydeen horay waxaana idinku Mannaystay Eebe korkiinna, ee caddaysta (Hubsada), Eebana waxaad Camal falaysaan waa Ogyahay.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِذَا ضَرَبۡتُمۡ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِ
فَتَبَيَّنُواْ وَلَا تَقُولُواْ لِمَنۡ أَلۡقَىٰٓ إِلَيۡكُمُ ٱلسَّلَٰمَ
لَسۡتَ مُؤۡمِنٗا تَبۡتَغُونَ عَرَضَ ٱلۡحَيَوٰةِ
ٱلدُّنۡيَا فَعِندَ ٱللَّهِ مَغَانِمُ كَثِيرَةٞۚ كَذَٰلِكَ
كُنتُم مِّن قَبۡلُ فَمَنَّ ٱللَّهُ عَلَيۡكُمۡ
فَتَبَيَّنُوٓاْۚ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ بِمَا تَعۡمَلُونَ
خَبِيرٗا ﴿٩٤﴾

95. Ma Sinna kuwa Fadhiya ee Mu'miniinta ah oon kuwa dhibban ahayn iyo kuwa kula Jahaadi Jidka Eebe Xoolahooda iyo Naftooda, wuu ka Fadilay Eebe kuwa ku Jahaaday Xoolahooda iyo Naftooda kuwa fadhiya Darajo, dhammaanna wuxuu u Yaboohay Wanaag, wuuna kaga fadilay Eebe kuwa Jahaaday kuwa Fadhiya Ajir wayn.

لَّا يَسۡتَوِي ٱلۡقَٰعِدُونَ مِنَ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ غَيۡرُ أُوْلِي ٱلضَّرَرِ
وَٱلۡمُجَٰهِدُونَ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِ بِأَمۡوَٰلِهِمۡ وَأَنفُسِهِمۡۚ فَضَّلَ
ٱللَّهُ ٱلۡمُجَٰهِدِينَ بِأَمۡوَٰلِهِمۡ وَأَنفُسِهِمۡ عَلَى ٱلۡقَٰعِدِينَ
دَرَجَةٗۚ وَكُلّٗا وَعَدَ ٱللَّهُ ٱلۡحُسۡنَىٰۚ وَفَضَّلَ ٱللَّهُ
ٱلۡمُجَٰهِدِينَ عَلَى ٱلۡقَٰعِدِينَ أَجۡرًا عَظِيمٗا ﴿٩٥﴾

96. Waa Darajooyin Xaggiisa ah iyo Dambidhaaf iyo Naxariis, Eebana waa Dambi Dhaafe Naxariiista.

دَرَجَٰتٖ مِّنۡهُ وَمَغۡفِرَةٗ وَرَحۡمَةٗۚ وَكَانَ ٱللَّهُ غَفُورٗا
رَّحِيمًا ﴿٩٦﴾

Aayadahanna waxay caddayn inaan lagu dag dagin Dilka Dadka hadday Islaanimo muujiyaan iyadoo la dooni in Xaqooda la bannaysto, illeen Cid walba marbay dhunsanayd Eebaana hanuuniyee, iyo inayna ekeyn Mu'miniinta cudur la'aan ka fadhiista Jahaadka iyo kuwa ku Jahaada Xoolahooda iyo Naftooda Jidka Eebe, wuxuu Eebe ka fadilay kuwa ku Jahaada Jidka Eebe kuwa ka Fadhiista, in kasta oo Mu'min dhamaantiis Eebe Wanaag u darbay, hadana wuxuu Eebe siin kuwa Jidkiisa ku Jahaada Darajooyin waawayn, Dambi dhaaf iyo Naxariis. waxayna ku tusin Aayaduhu in wax la hubsado een lagu dag dagin ciddaan la hubin Gaalnimadiisa, iyo in Jidka Eebe ku Jahaadkiisu leeyahay Fadli iyo Ajir wayn. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Janada waxaa ah Boqol Darajo oo Eebe u darbay kuwa ku jahaada Jidkiisa, Labadii Darajana waxaa u dhaxaysa sida Cirka iyo Dhulka, wakaas fadliga Jahaadka, waa Cisiga iyo Sharafta Mu'miniinta iyagoon Cidna Dulmiyeyn, markayse ka tageen Jahaadka waa kuwaas Dulloobay ee la Addoonsaday ee la Qaybsaday iyagoo Dhulkoodii laga Xoogay lagana saaray. An-Nisaa' (94-96).

---

97. Kuway Oofsato Malaa'igtu iyagoo Dulmiyey Naftooda waxay ku Dhahaan maxaad ahaydeen waxayna dhahaan kuwo lagu Daciifsaday (tabar yar) Dhulka, waxayna dhahaan (Malaa'igtii) miyeyna ahayn Dhulka

إِنَّ ٱلَّذِينَ تَوَفَّىٰهُمُ ٱلۡمَلَٰٓئِكَةُ ظَالِمِيٓ أَنفُسِهِمۡ قَالُواْ
فِيمَ كُنتُمۡۖ قَالُواْ كُنَّا مُسۡتَضۡعَفِينَ فِي ٱلۡأَرۡضِۚ قَالُوٓاْ
أَلَمۡ تَكُنۡ أَرۡضُ ٱللَّهِ وَٰسِعَةٗ فَتُهَاجِرُواْ فِيهَاۚ فَأُوْلَٰٓئِكَ

Eebe Waasac ood ku Hijrootaan dhexdeeda, kuwaas Hooygoodu waa Jahannamo wayna u Xuntahay Aaye.

مَأْوَاهُمْ جَهَنَّمُ ۖ وَسَاءَتْ مَصِيرًا ﴿٩٧﴾

98. Kuwa la Daciifsado oo Rag, Haween iyo Caruur oon tabar lahayn kuna Toosi karin Jidka mooyee.

إِلَّا الْمُسْتَضْعَفِينَ مِنَ الرِّجَالِ وَالنِّسَاءِ وَالْوِلْدَانِ
لَا يَسْتَطِيعُونَ حِيلَةً وَلَا يَهْتَدُونَ سَبِيلًا ﴿٩٨﴾

99. Kuwaas wuxuu u dhawyahay Eebe inuu iska Cafiyo Xaggooda, Eebana waa Saamaxe Dhaafa (Dambiga).

فَأُولَٰئِكَ عَسَى اللَّهُ أَنْ يَعْفُوَ عَنْهُمْ ۚ وَكَانَ اللَّهُ عَفُوًّا
غَفُورًا ﴿٩٩﴾

100. Ruuxii ku Hijrooda Jidka Eebe wuxuu ka heli Dhulka Magangal badan iyo Waasacnimo, Ruuxii ka Baxa Gurigiisa isagoo u Hijroon Xagga Eebe iyo Rasuulkiisa markaas uu haleelo Mawdku (Geeridu) wuxuu ku sugnaaday Ajrigiisu Eebe (Fadli dartiis) Eebana waa (Dambi) Dhaafe Naxariista.

۞ وَمَنْ يُهَاجِرْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ يَجِدْ فِي الْأَرْضِ مُرَاغَمًا
كَثِيرًا وَسَعَةً ۚ وَمَنْ يَخْرُجْ مِنْ بَيْتِهِ مُهَاجِرًا إِلَى اللَّهِ
وَرَسُولِهِ ثُمَّ يُدْرِكْهُ الْمَوْتُ فَقَدْ وَقَعَ أَجْرُهُ عَلَى اللَّهِ ۗ
وَكَانَ اللَّهُ غَفُورًا رَحِيمًا ﴿١٠٠﴾

Diinta Islaamku ma ogola inay ku dullaysato Gaalo adooMuslim ah, maxaayeelay waa laga fogaan karaa si loogu darbado Jahaadkooda siday faleen Muslimiintii hore, hase yeeshee Dadka tabarta yar ee ah Rag, Haween iyo Caruurba dhib ma saara hadday ku dhexnoolaadaan Eebana wuxuu u dhawyahay inuu iska Saamaxo, Ruuxiise dar Eebe u Hijrooda wuxuu ka heli Dhulka Khayr iyo Waasacnimo, Ciddii ka baxda Gurigeeda iyadoo u hijroon dar Eebe iyo Rasuulka oo dhinta kuwaas Eebaa Ajir iyo Wanaag ku Abaal marin. Taasina waxay ku tusin inay Waajib tahay in la Wanaajiyo Niyada, siduu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) uu yidhi: Camalku waa uun Niyo Cid walbana waxay Mudan waxay Niyooto.. Tan kale waa inaan Muslim qaadanin Dullaynta Gaalada, uuna Dulliga Gaalada ka baxo si kasta oo Suurowda oo Hijro iyo ka Durkid ah, isagoo la Jahaadi. An-Nisaa' (97-100).

---

101. Haddaad ku Safartaan Dhulka ma aha korkiinna Dhib (Dambi) inaad Gaabisaan Salaadda Haddaad ka Cabsataan inay idin Fidmeeyan (Dhibaan) kuwa Gaaloobay, Gaaladuna waxay idiin yihiin Col Cad.

وَإِذَا ضَرَبْتُمْ فِي الْأَرْضِ فَلَيْسَ عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ أَنْ تَقْصُرُوا
مِنَ الصَّلَاةِ إِنْ خِفْتُمْ أَنْ يَفْتِنَكُمُ الَّذِينَ كَفَرُوا ۚ
إِنَّ الْكَافِرِينَ كَانُوا لَكُمْ عَدُوًّا مُبِينًا ﴿١٠١﴾

102. Markaad tahay dhexdooda Muslimiinta ood u oogto Salaadda ha istaagto Koox ka mid ah Agtaada hana Qaateen Hubkooda, markay Sujuudaan ha ahaadeen Gadaashiinna, hana timaado Koox kale oon Tukanin hana Tukadeen la jirkaaga hana Qaateen Digtoonidooda iyo Hubkooda, waxay Jecelyihiin kuwa Gaaloobay inaad halmaantaan Hubkiinna iyo Alaabtiinna oo markaas ay idin soo Weeraraan mar

وَإِذَا كُنْتَ فِيهِمْ فَأَقَمْتَ لَهُمُ الصَّلَاةَ فَلْتَقُمْ
طَائِفَةٌ مِنْهُمْ مَعَكَ وَلْيَأْخُذُوا أَسْلِحَتَهُمْ فَإِذَا
سَجَدُوا فَلْيَكُونُوا مِنْ وَرَائِكُمْ وَلْتَأْتِ
طَائِفَةٌ أُخْرَىٰ لَمْ يُصَلُّوا فَلْيُصَلُّوا مَعَكَ
وَلْيَأْخُذُوا حِذْرَهُمْ وَأَسْلِحَتَهُمْ ۗ وَدَّ الَّذِينَ كَفَرُوا
لَوْ تَغْفُلُونَ عَنْ أَسْلِحَتِكُمْ وَأَمْتِعَتِكُمْ

kaliya (Idinku kadiyaan) Korkiinna ma aha Dhib hadduu idin hayo dhib Roob ah ama aad tihiin kuwa buka inaad dajisaan Hubka Qaatana Digtoonidiinna, Eebana wuxuu u darbay Gaalada Cadaab wax Dulleeya.

فَيَمِيلُونَ عَلَيْكُم مَّيْلَةً وَاحِدَةً ۚ وَلَا جُنَاحَ
عَلَيْكُمْ إِن كَانَ بِكُمْ أَذًى مِّن مَّطَرٍ أَوْ كُنتُم
مَّرْضَىٰ أَن تَضَعُوا أَسْلِحَتَكُمْ ۖ وَخُذُوا
حِذْرَكُمْ ۗ إِنَّ اللَّهَ أَعَدَّ لِلْكَافِرِينَ عَذَابًا مُّهِينًا ﴿١٠٢﴾

**Aayadda hore waxay ka warrami inay Banaantahay Gaabinta Salaadda marka socotada la yahay, taasoo ah in Duhurka, Casarka iyo Cishaha Labo Labo laga Tukado, waana Naxariis Eebe iyo Fududayn.**
**Aayadda kale waxay ka warrami Salaadda waqtiga Dagaalka iyo sida loo Tukan, oo ah Qoonna Tukan Qoonna ILaalin Colka iyagoo Hubka haysta. Taasina waxay ku tusin waynida Salaadda iyo Jameecaadka iyo inaan laga tagayn, tan kale waxay ku tusin Ahmiyadda Jahaadka iyo Darbashada.**
**Arrinta Salaadda Dagaalka iyo Cabsida waxay ku faah faahsan tahay Kutubaha, waxaase muhiim ah in la ogaado Waynideeda iyo Waajibnimadeeda. An-Nisaa' (101-102).**

---

103. Markaad gudataan Salaadda Xusa Eebe Taagni, Fadhi iyo Dhiniciinaba (Jiif) markaad xasishaanna (Aamin noqotaan) Ooga Salaadda (Dhameeya) Salaaddu waxay ku tahay Mu'miniinta Xukun Waqtiyeysan (Mudaysan).

فَإِذَا قَضَيْتُمُ الصَّلَاةَ فَاذْكُرُوا اللَّهَ قِيَامًا
وَقُعُودًا وَعَلَىٰ جُنُوبِكُمْ ۚ فَإِذَا اطْمَأْنَنتُمْ
فَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ ۚ إِنَّ الصَّلَاةَ كَانَتْ
عَلَى الْمُؤْمِنِينَ كِتَابًا مَّوْقُوتًا ﴿١٠٣﴾

104. Haka Daciifina (Jilcina) Doonidda Qoomka (Gaalada) haddaad tihiin kuwa Xanuunsan iyaguba way xanuunsan sidaad u xanuunsanaysaan, waxaadna ka rajaynaysaan Eebe waxayna ka rajaynayn, Eebana waa Oge falsan.

وَلَا تَهِنُوا فِي ابْتِغَاءِ الْقَوْمِ ۖ إِن تَكُونُوا تَأْلَمُونَ
فَإِنَّهُمْ يَأْلَمُونَ كَمَا تَأْلَمُونَ ۖ وَتَرْجُونَ مِنَ
اللَّهِ مَا لَا يَرْجُونَ ۗ وَكَانَ اللَّهُ عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿١٠٤﴾

105. Anagaa kugu soo Dajinay Kitaabka si Xaq ah inaad ku kala Xukunto Dadka dhexdiisa wuxuu ku tusiyo Eebe, hana u noqonin Khaa'in u doode.

إِنَّا أَنزَلْنَا إِلَيْكَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ لِتَحْكُمَ بَيْنَ
النَّاسِ بِمَا أَرَاكَ اللَّهُ ۚ وَلَا تَكُن لِّلْخَائِنِينَ
خَصِيمًا ﴿١٠٥﴾

106. Dambi dhaaf warso Eebe, ILaahay waa Dambi Dhaafe Naxariista.

وَاسْتَغْفِرِ اللَّهَ ۖ إِنَّ اللَّهَ كَانَ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿١٠٦﴾

107. Ha ka Doodin kuwa Khayaamayn Naftooda, Eebana ma Jecla Khayaamo badane Dambi badan.

وَلَا تُجَادِلْ عَنِ الَّذِينَ يَخْتَانُونَ أَنفُسَهُمْ ۚ إِنَّ اللَّهَ
لَا يُحِبُّ مَن كَانَ خَوَّانًا أَثِيمًا ﴿١٠٧﴾

108. Waxay iska qarin Dadka iskamana Qariyaan Eebe isagoo la jooga markay Maamuli wuxuusan raalli ka ahayn oo hadal ah, Eebana waxay Camal fali wuu Koobay.

يَسْتَخْفُونَ مِنَ النَّاسِ وَلَا يَسْتَخْفُونَ مِنَ اللَّهِ
وَهُوَ مَعَهُمْ إِذْ يُبَيِّتُونَ مَا لَا يَرْضَىٰ مِنَ الْقَوْلِ ۚ
وَكَانَ اللَّهُ بِمَا يَعْمَلُونَ مُحِيطًا ﴿١٠٨﴾

109. Idinku kuwaasow waad ka doodeen Xaggooda Nolosha Adduunyo, yaase ka doodi Xaggooda Maalinta Qiyaame ama u noqon Wakiil.

هَٰٓأَنتُمۡ هَٰٓؤُلَآءِ جَٰدَلۡتُمۡ عَنۡهُمۡ فِي ٱلۡحَيَوٰةِ
ٱلدُّنۡيَا فَمَن يُجَٰدِلُ ٱللَّهَ عَنۡهُمۡ يَوۡمَ
ٱلۡقِيَٰمَةِ أَم مَّن يَكُونُ عَلَيۡهِمۡ وَكِيلٗا ١٠٩

**Aayadahanna waxay caddayn in Eebe la Xuso Salaadda Dabadeed iyo si kastoo la yahay, markaan Dagaal lajooginna Salaadda la dhamaystiro, tan kale waa inaan Jahaadka laga Cabsanin illeen haddaynu Xanuunsan Gaaladuba way Xanuunsane waxaynnu Eebana ka rajayn Janno iyo Liibaan ayna iyagu rajaynayn. Quraankana waxaa loo soo dajiyey in laysku Xukumo, Xumaantana waa inaan Garab la siin, Eebana Dambi dhaaf la warsado oon lagana doodin Xagga kuwa Khaa'imiinta ah, ee Dadka iska Qarin, Eebana aan iska ilaalinayn markay wax qarsan, Cid Qiyaame wax u tarina ma jirto. An-Nisaa' (103-109).**

---

110. Ruuxii fala Xumaan ama Dulmiya Naftiisa (Dambaaba) markaas dambi dhaaf warsada Eebe wuxuu ka heli (ogaana) isagoo Dambi dhaafa ah Naxariistana.

وَمَن يَعۡمَلۡ سُوٓءًا أَوۡ يَظۡلِمۡ نَفۡسَهُۥ ثُمَّ يَسۡتَغۡفِرِ
ٱللَّهَ يَجِدِ ٱللَّهَ غَفُورٗا رَّحِيمٗا ١١٠

111. Ruuxii kasbada danbi wuxuu uun u kasbaday Naftiisa (Dhibkeeda) Eebana waa oge Falsan.

وَمَن يَكۡسِبۡ إِثۡمٗا فَإِنَّمَا يَكۡسِبُهُۥ عَلَىٰ نَفۡسِهِۦۚ
وَكَانَ ٱللَّهُ عَلِيمًا حَكِيمٗا ١١١

112. Ruuxii kasbada Gaf ama Dambi markaas ku gana Dambiga (ku sheega) mid barii ah wuxuu Xambaartay Been abuurasho iyo Dambi Cad.

وَمَن يَكۡسِبۡ خَطِيٓـَٔةً أَوۡ إِثۡمٗا ثُمَّ يَرۡمِ بِهِۦ بَرِيٓـٔٗا
فَقَدِ ٱحۡتَمَلَ بُهۡتَٰنٗا وَإِثۡمٗا مُّبِينٗا ١١٢

113. Hadduusan jirin fadliga Eebee korkaaga iyo Naxariistiisa waxay Hammin lahayd Koox (dooni lahayd) oo ka mid ah inay ku dhumiyaan mana dhumiyaan Naftooda mooyee mana kaa dhibaan waxba, wuxuuna kugu soo dajiyey Eebe Kitaabka iyo Xigmadda wuxuuna ku baray waxaadan aqoon Fadliga Eebana korkaaga waa ku waynyahay.

وَلَوۡلَا فَضۡلُ ٱللَّهِ عَلَيۡكَ وَرَحۡمَتُهُۥ لَهَمَّت
طَّآئِفَةٞ مِّنۡهُمۡ أَن يُضِلُّوكَ وَمَا يُضِلُّونَ
إِلَّآ أَنفُسَهُمۡۖ وَمَا يَضُرُّونَكَ مِن شَيۡءٖۚ وَأَنزَلَ ٱللَّهُ
عَلَيۡكَ ٱلۡكِتَٰبَ وَٱلۡحِكۡمَةَ وَعَلَّمَكَ مَا لَمۡ
تَكُن تَعۡلَمُۚ وَكَانَ فَضۡلُ ٱللَّهِ عَلَيۡكَ عَظِيمٗا ١١٣

114. Khayr ma leh wax badan oo Faqooda ah, oon ahayn mid fara Sadaqo ama Wanaag ama Hagaajin Dadka dhexdooda, Ruuxii fala Saas doonid raalli ahaanshaha Eebe waxaanu siin Ajir wayn.

۞ لَّا خَيۡرَ فِي كَثِيرٖ مِّن نَّجۡوَىٰهُمۡ إِلَّا مَنۡ أَمَرَ
بِصَدَقَةٍ أَوۡ مَعۡرُوفٍ أَوۡ إِصۡلَٰحِۭ بَيۡنَ ٱلنَّاسِۚ
وَمَن يَفۡعَلۡ ذَٰلِكَ ٱبۡتِغَآءَ مَرۡضَاتِ
ٱللَّهِ فَسَوۡفَ نُؤۡتِيهِ أَجۡرًا عَظِيمٗا ١١٤

115. Ruuxii Khilaafa Rasuulka ka dib intuu u cadaaday Hanuunku oo Raaca Jidka Mu'miniinta midaan ahayn waxaa uga wali yeeleynaa wuxuu yeeshay waxaana galinaynaa Jahannamo iyadaana u Xun meel loo ahaado.

وَمَن يُشَاقِقِ ٱلرَّسُولَ مِنۢ بَعۡدِ مَا تَبَيَّنَ لَهُ ٱلۡهُدَىٰ
وَيَتَّبِعۡ غَيۡرَ سَبِيلِ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ نُوَلِّهِۦ مَا تَوَلَّىٰ
وَنُصۡلِهِۦ جَهَنَّمَۖ وَسَآءَتۡ مَصِيرًا ١١٥

**Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Wuxuu uga warramay Eebe Addoomadiisa Cafigiisa, Dulqaadkiisa, Deeqdiisa, Naxariistiisa Waasaca ah iyo Dambi dhaafkiisa, Ruuxii Dambaaba ha yaraado ama ha waynaado oo dambi dhaaf warsada Eebe, wuxuu heli Eebe oo Dambi dhaafi oo Naxariisan, haba ka waynaato Samaawaadka iyo Dhulka iyo Buuraha. Tan kale Gaaladu waxay uun baadiyeyn naftooda. Eebana wuxuu siiyey Nabiga Kitaab iyo Xigmo wuxuuna baray wuxuuna aqoonin. Eebaana Fadli wayn siiyay.**
**Faqaan Wanaag ahayna ma fiicna, ciddii ka leexata Jidka Nabiga iyo Mu'miniintana wuxuu galin Naar daran. An-Nisaa' (110-115).**

---

116. Eebe ma dhaafo in lala Wadaajiyo (Cidkale Cibaadada) wuuse ka dhaafa wixii waxaas ka soo hadhay Cidduu doono, Ruuxii la wadaajiya Eebe wuxuu dhumay dhumid wayn.

إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَغۡفِرُ أَن يُشۡرَكَ بِهِۦ وَيَغۡفِرُ مَا دُونَ
ذَٰلِكَ لِمَن يَشَآءُۚ وَمَن يُشۡرِكۡ بِٱللَّهِ فَقَدۡ
ضَلَّ ضَلَٰلَۢا بَعِيدًا ١١٦

117. ma Caabudayaan Eebe ka sokow waxaan dhadig ahayn, mana Caabudayaan waxaan Shaydaan madax adag ahayn,

إِن يَدۡعُونَ مِن دُونِهِۦٓ إِلَّآ إِنَٰثٗا وَإِن
يَدۡعُونَ إِلَّا شَيۡطَٰنٗا مَّرِيدٗا ١١٧

118. Ha Lacnado Eebe shaydaan wuxuu yidhi waxaan ku yeelan Addomada Qayb Sugan.

لَّعَنَهُ ٱللَّهُۘ وَقَالَ لَأَتَّخِذَنَّ مِنۡ عِبَادِكَ
نَصِيبٗا مَّفۡرُوضٗا ١١٨

119. waan baadiyeyn waan yididiilo (Xun) galin waana fari (Xumaanta) waxayna jeex jeexi Dhagaha Xoolaha waana fari (Xumaanta) waxayna doorin abuurka Eebe ruuxii ka yeesha shaydaan Wali Eebe ka sokow dhab ahaan buu u Khasaaray Khasaare Cad.

وَلَأُضِلَّنَّهُمۡ وَلَأُمَنِّيَنَّهُمۡ وَلَأٓمُرَنَّهُمۡ
فَلَيُبَتِّكُنَّ ءَاذَانَ ٱلۡأَنۡعَٰمِ وَلَأٓمُرَنَّهُمۡ
فَلَيُغَيِّرُنَّ خَلۡقَ ٱللَّهِۚ وَمَن يَتَّخِذِ
ٱلشَّيۡطَٰنَ وَلِيّٗا مِّن دُونِ ٱللَّهِ فَقَدۡ
خَسِرَ خُسۡرَانٗا مُّبِينٗا ١١٩

120. wuu u yaboohi oo yididiila galin mana yabooho shaydaan waxaan dhagar ahayn.

يَعِدُهُمۡ وَيُمَنِّيهِمۡۖ وَمَا يَعِدُهُمُ ٱلشَّيۡطَٰنُ
إِلَّا غُرُورًا ١٢٠

121. kuwaasna hooygoodu waa Jahannamo kamana helaan xaggeeda iilasho (iyo fakasho).

أُوْلَٰٓئِكَ مَأۡوَىٰهُمۡ جَهَنَّمُ وَلَا يَجِدُونَ عَنۡهَا
مَحِيصٗا ١٢١

122. kuwa rumeeyey xaqa oo fala camal fiican waxaannu galin Jannooyin oy socoto dhexdeeda Wabiyaal oyna ku waari dhexdeeda waligeed, waana yabooha Eebe oo sugan, yaa ka run badan Eebe hadal (cidna).

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ
سَنُدۡخِلُهُمۡ جَنَّٰتٖ تَجۡرِي مِن تَحۡتِهَا
ٱلۡأَنۡهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدٗاۖ وَعۡدَ ٱللَّهِ حَقّٗاۚ
وَمَنۡ أَصۡدَقُ مِنَ ٱللَّهِ قِيلٗا ﴿١٢٢﴾

**Eebe wuu ka dhaafaa waxaan gaalnimo ahayn Cidduu doono, gaalana waxay Caabudaan Sanamyo iyo shaydaan Eebe lacnaday oo ballan qaaday inuu qayb ku yeeshaa Dadka, kuna dhaartay inuu dhumiyaa oo Xumaan faraa intay ka dooriyaan Abuurka Eebe, ciddii shaydaan wali ka yeelatana wuxuu khasaaray khasaare wayn. wuxuu yaboohina waa dhagar iyo naar, ciddiise xaqa raacda oo camal fiican fasha wuxuu gali janno uu ku waari, Eebana waa runle, Nabiguna (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi:**
**Hadal waxaa u runbadan hadalka Eebe, hanuunna waxaa u fiican hanuunka Muxamed, waxaana u xun umuuraha waxaa la soo darriyey waana Bidco baadi ah. An-Nisaa' (116-122).**

---

123. Ma aha (xaalku) yididiiladiinna iyo yididiilada ehelu Kitaabka midna, ciddii fasha xumaan waa laga Abaal marin mana helayo Eebe ka sokow wali iyo gargaare (midna).

لَّيۡسَ بِأَمَانِيِّكُمۡ وَلَآ أَمَانِيِّ أَهۡلِ ٱلۡكِتَٰبِۗ
مَن يَعۡمَلۡ سُوٓءٗا يُجۡزَ بِهِۦ وَلَا يَجِدۡ لَهُۥ مِن
دُونِ ٱللَّهِ وَلِيّٗا وَلَا نَصِيرٗا ﴿١٢٣﴾

124. ruuxii fala wanaag lab ah ama dhadig isagoo rumeysan (xaqa) kuwaasu waxay gali Janada lagamana dulmiyo duleel (laftimireed).

وَمَن يَعۡمَلۡ مِنَ ٱلصَّٰلِحَٰتِ مِن ذَكَرٍ
أَوۡ أُنثَىٰ وَهُوَ مُؤۡمِنٞ فَأُوْلَٰٓئِكَ يَدۡخُلُونَ ٱلۡجَنَّةَ
وَلَا يُظۡلَمُونَ نَقِيرٗا ﴿١٢٤﴾

125. yaa ka diin fiican ruux u jeediyey wajigiisa Eebe isagoo sama fali oo raaca diinta (Nabi) Ibraahim, wuxuuna ka yeeshay Eebe Ibraahiim khaliil (mid u gaar ah).

وَمَنۡ أَحۡسَنُ دِينٗا مِّمَّنۡ أَسۡلَمَ وَجۡهَهُۥ لِلَّهِ
وَهُوَ مُحۡسِنٞ وَٱتَّبَعَ مِلَّةَ إِبۡرَٰهِيمَ حَنِيفٗاۗ
وَٱتَّخَذَ ٱللَّهُ إِبۡرَٰهِيمَ خَلِيلٗا ﴿١٢٥﴾

126. Eebe waxaa u sugnaaday waxa ku sugan Samooyinka iyo Dhulka, Eebana waa wax walba koobe.

وَلِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِۚ
وَكَانَ ٱللَّهُ بِكُلِّ شَيۡءٖ مُّحِيطٗا ﴿١٢٦﴾

127. waxay ku warsan Haweenka, waxaad dhahdaa Eebaa idiin fidyoon (sheegi) Xaalkooda iyo waxa lagu akhriyi korkiinna Kitaabka Haweenka Agoonta ah ee ah kuwaydaan siinayn

وَيَسۡتَفۡتُونَكَ فِي ٱلنِّسَآءِۖ قُلِ ٱللَّهُ يُفۡتِيكُمۡ
فِيهِنَّ وَمَا يُتۡلَىٰ عَلَيۡكُمۡ فِي ٱلۡكِتَٰبِ فِي
يَتَٰمَى ٱلنِّسَآءِ ٱلَّٰتِي لَا تُؤۡتُونَهُنَّ مَا كُتِبَ

waxa loo qadaray oo doonaysaan inaad guursataan iyo kuwa tabarta yar ee caruurta ah, iyo inaad u maamushaan Agoonta cadaalad, waxaad fashaan oo kheeyr ahna Eebe waa ogyahay.

لهن وترغبون أن تنكحوهن والمستضعفين
من الولدان وأن تقوموا لليتامى
بالقسط ۚ وما تفعلوا من خير
فإن الله كان به عليما ﴿١٢٧﴾

**Waxaa jirtay inay Isufaaneen Muslimiin iyo Gaalo, markaas Eebe soo dajiyey Aayaddan mana aha cidna waxay iyadu doonto ee Xumaan iyo Wanaagba waa layska abaal marin, Rag iyo Haweenna waxba lagama Nusqaamiyo wanaagay falaan. Wax ka fiicanna ma jiro cid raacday waddadii Nabi Ibraahim oo ah Diinta Islaamka. Aayadda dambana waxay ka warrami sida loola dhaqmi Haweenka Agoonta ah ee dhaqaalaynaysaan iyo kuwa tabarta yar ee caruurta ah iyo in agoonta caddaalad lagu dhaqo, illeen Eebaa wax walba oge. Markay soo dagtay Aayadda hore yey naxeen Asaxaabtii oy dheheen waxba uma reebin Ummadan, markaasuu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) yidhi: Way soo dagtaye bishaaraysta oo dhex dhexaysta.. An-Nisaa' (123-127).**

---

128. hadday Haweeney ka cabsato Ninkeeda xaggiisa fogaansho ama jeedsasho dhib ma saara korkooda hadday heshiiyaan heshiis, heshiiskaana khayr ah, waxaana lagu soo kulmiyey nafta bakhaylnimo, haddaad se Wanaag fashaan ood dhawrsataan Eebe waxaad Camal falaysaan waa ogyahay.

وإن امرأة خافت من بعلها نشوزا أو إعراضا
فلا جناح عليهما أن يصلحا بينهما صلحا ۚ
والصلح خير ۗ وأحضرت الأنفس الشح ۚ
وإن تحسنوا وتتقوا فإن الله كان
بما تعملون خبيرا ﴿١٢٨﴾

129. ma kartaan inaad sintaan Haweenkiinna dhexdooda aadba dadaasheene ee ha ka iilanina iilasho dhan, oo ka tagtaan sida mid xidhan (dayacan), haddaad wanaajisaan ood dhawrsataan Eebe waa dambi dhaafe Naxariista.

ولن تستطيعوا أن تعدلوا بين النساء
ولو حرصتم ۖ فلا تميلوا كل الميل
فتذروها كالمعلقة ۚ وإن تصلحوا وتتقوا
فإن الله كان غفورا رحيما ﴿١٢٩﴾

130. hadday kala tagaan wuu kaafiyaa Eebe mid kasta waasacnimadiisa, Eebana waa waasac (Fadligiisu) waana falsame.

وإن يتفرقا يغن الله كلا من سعته ۚ
وكان الله واسعا حكيما ﴿١٣٠﴾

131. Eebaa iska leh waxa Samaawaadka ku sugan iyo dhulka, waxaana u dardaaranay kuwii la siiyey Kitaabka ee idinka horeeyey iyo idinkaba ka dhawrsada Eebe, haddaadse gaaloowdaan Eebe waxaa u sugnaaday waxa ku sugan Samaawaadka iyo dhulka, Eebana waa hodan Amaanan.

ولله ما في السماوات وما في الأرض ۗ ولقد
وصينا الذين أوتوا الكتاب من قبلكم
وإياكم أن اتقوا الله ۚ وإن تكفروا فإن لله
ما في السماوات وما في الأرض ۚ وكان الله غنيا
حميدا ﴿١٣١﴾

132. Eebaa iska leh waxa ku sugan Samaawaadka iyo DHulka waana ku filanyahay Eebe Wakiil.

وَلِلَّهِ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ ۚ وَكَفَىٰ بِاللَّهِ
وَكِيلًا ﴿١٣٢﴾

133. hadduu doono wuu idin tagsiin (dhamayn) Dadow lana imaan kuwo kale waana karaa Eebe Taas.

إِن يَشَأْ يُذْهِبْكُمْ أَيُّهَا النَّاسُ وَيَأْتِ
بِآخَرِينَ ۚ وَكَانَ اللَّهُ عَلَىٰ ذَٰلِكَ قَدِيرًا ﴿١٣٣﴾

134. Ruuxii dooni abaal Adduunyo Eebe agtiisa yuu jiraa Abaalka Adduunyo iyo Aakhiraba Eebana waa Maqle Arka.

مَّن كَانَ يُرِيدُ ثَوَابَ الدُّنْيَا فَعِندَ اللَّهِ ثَوَابُ
الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ ۚ وَكَانَ اللَّهُ سَمِيعًا بَصِيرًا ﴿١٣٤﴾

**Hadday Haweenaydu ka kasto ninkeeda Fogaansho ama Jeedsasho waa inay heshiiyaan XuMaantana Layska jiraa, tan kale in caddaaladda lagu dadaalo ciddii Laba Haweena Qabta, haddii lakala tagana Eebaa deeqi cid walba, Rasuulkuna (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Ciddii laba haweena qaba oo u iisha midood wuxuu yimaadaa Maalinta Qiyaame isagoo dhinac leexsan. Tan kale Eebaa Xukunka iska leh, wuxuuna faray Dadka dhamaan Alla ka yaabid, illeen hadduu doono wuu dhamayn karaa Dadkee, Aakhiro iyo Adduunba Eebaa iska leh, waana in si quruxsan Eebe looga Doono. An-Nisaa' (128-134).**

---

135. kuwa (Xaqa) rumeeyow noqda kuwo u istaaaga Caddaalad oo ah marag Eebe, naftiinnaba ha ahaato ama Waalidkiin ama qaraabo, hadday hodan yihiin ama faqiir Eebaa u mudnaansho badan ee ha ka raacina hawada inaad Caddaalo fashaan, haddaadse iilataan ama jeedsataan Eebe waxaad camal falaysaan waa ogyahay.

۞ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُونُوا قَوَّامِينَ بِالْقِسْطِ
شُهَدَاءَ لِلَّهِ وَلَوْ عَلَىٰ أَنفُسِكُمْ أَوِ الْوَالِدَيْنِ
وَالْأَقْرَبِينَ ۚ إِن يَكُنْ غَنِيًّا أَوْ فَقِيرًا فَاللَّهُ أَوْلَىٰ
بِهِمَا ۖ فَلَا تَتَّبِعُوا الْهَوَىٰ أَن تَعْدِلُوا ۚ وَإِن تَلْوُوا
أَوْ تُعْرِضُوا فَإِنَّ اللَّهَ كَانَ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرًا ﴿١٣٥﴾

136. kuwa (Xaqa) rumeeyow rumeeya Eebe (si dhabah) iyo Rasuulkiisa iyo Kitaabka uu ku dejiyey Rasuulkiisa iyo Kitaabkuu u dejiyey horay, ruuxiise ka gaalooba Eebe, malaa'igtiisa, kutubtiisa, rasuuladiisa iyo maalinta dambe (Qiyaamada) wuu dhumay dhumid fog.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا آمِنُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ
وَالْكِتَابِ الَّذِي نَزَّلَ عَلَىٰ رَسُولِهِ
وَالْكِتَابِ الَّذِي أَنزَلَ مِن قَبْلُ ۚ وَمَن يَكْفُرْ
بِاللَّهِ وَمَلَائِكَتِهِ وَكُتُبِهِ وَرُسُلِهِ وَالْيَوْمِ
الْآخِرِ فَقَدْ ضَلَّ ضَلَالًا بَعِيدًا ﴿١٣٦﴾

137. kuwa rumeeyey ee gaaloobay ee hadana rumeeyey ee gaaloobay markaas sii badsaday Gaalnimo ma aha Eebe mid u dhaafi iyaga, kumana hanuuniyo Jidka (Toosan).

إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا ثُمَّ كَفَرُوا ثُمَّ آمَنُوا ثُمَّ كَفَرُوا
ثُمَّ ازْدَادُوا كُفْرًا لَّمْ يَكُنِ اللَّهُ لِيَغْفِرَ لَهُمْ وَلَا لِيَهْدِيَهُمْ
سَبِيلًا ﴿١٣٧﴾

بَشِّرِ ٱلْمُنَٰفِقِينَ بِأَنَّ لَهُمْ عَذَابًا أَلِيمًا ﴿١٣٨﴾
ٱلَّذِينَ يَتَّخِذُونَ ٱلْكَٰفِرِينَ أَوْلِيَآءَ مِن دُونِ ٱلْمُؤْمِنِينَ ۚ
أَيَبْتَغُونَ عِندَهُمُ ٱلْعِزَّةَ فَإِنَّ ٱلْعِزَّةَ لِلَّهِ جَمِيعًا ﴿١٣٩﴾

138. ugu bishaaree munaafiqiinta inay mudan Cadaab daran.

139. waana kuwa ka yeesha Gaalada sokeeye Mu'miniinta ka sokow, ma waxay ka dooni Agtooda sharaf, sharafna Eebaa iska leh dhammaanteed.

وَقَدْ نَزَّلَ عَلَيْكُمْ فِى ٱلْكِتَٰبِ أَنْ إِذَا سَمِعْتُمْ
ءَايَٰتِ ٱللَّهِ يُكْفَرُ بِهَا وَيُسْتَهْزَأُ بِهَا فَلَا تَقْعُدُوا۟
مَعَهُمْ حَتَّىٰ يَخُوضُوا۟ فِى حَدِيثٍ غَيْرِهِۦٓ ۚ إِنَّكُمْ إِذًا
مِّثْلُهُمْ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ جَامِعُ ٱلْمُنَٰفِقِينَ وَٱلْكَٰفِرِينَ
فِى جَهَنَّمَ جَمِيعًا ﴿١٤٠﴾

140. wuxuuna idiin ku soo dejiyey korkiinna Kitaabka dhexdiisa haddaad maqashaan Aayaadka Eebe oo laga gaaloobi ama lagu jees jeesi ha fadhiisanina agtooda intay ka dhumbadaan hadal kale, waxaad noqonaysaan iyaga oo kale, Eebana wuxuu ku kulmin Munaafiqiinta iyo Gaalada Jahannamo dhammaan.

**Waa in caddaaladda lagu dadaalaa Naftaada, Waalidkaa iyo Qaraabadaadaba ha ahaatee, illeen Eebaa ku mudnaan badane, waana inaan hawada la raacin waana in si dhab ah loo rumeeyo Eebe, Rasuulkiisa, Kitaabka Quraanka ah iyo kutubtii horaba, ciddii ka gaalowda Eebe, malaa'igta, Rasuulada iyo maalinta dambe waa cid dhuntay. kuwase marna gaalooba marna wax rumeyn Waa kuwo dhumay, munaafiqiintana waxay gali naar daran, waana kuwa gaalada sokeeye ka dhigan, kuna jees jeesa quraanka iyo xaqa, abaalkooduna waa naar. An-Nisaa' (135-140).**

---

ٱلَّذِينَ يَتَرَبَّصُونَ بِكُمْ فَإِن كَانَ لَكُمْ فَتْحٌ مِّنَ ٱللَّهِ
قَالُوٓا۟ أَلَمْ نَكُن مَّعَكُمْ وَإِن كَانَ لِلْكَٰفِرِينَ
نَصِيبٌ قَالُوٓا۟ أَلَمْ نَسْتَحْوِذْ عَلَيْكُمْ وَنَمْنَعْكُم
مِّنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ۚ فَٱللَّهُ يَحْكُمُ بَيْنَكُمْ يَوْمَ
ٱلْقِيَٰمَةِ ۗ وَلَن يَجْعَلَ ٱللَّهُ لِلْكَٰفِرِينَ عَلَى
ٱلْمُؤْمِنِينَ سَبِيلًا ﴿١٤١﴾

141. oo ah kuwa idin la suga (dhibaato) hadduu gargaar xagga Eebe idiinka ahaado waxay dhihi miyaanaan idinla jirin, hadduu gaalada u sugnaado nasiibna waxay dhahaan miyaanaan idin adkeynin oonaan idinka reeebin Mu'miniinta, Eebaa xukumi dhexdooda maalinta Qiyaame, mana ugu yeelayo Eebe gaalada mu'miniinta korkooda waddo.

إِنَّ ٱلْمُنَٰفِقِينَ يُخَٰدِعُونَ ٱللَّهَ وَهُوَ خَٰدِعُهُمْ
وَإِذَا قَامُوٓا۟ إِلَى ٱلصَّلَوٰةِ قَامُوا۟ كُسَالَىٰ يُرَآءُونَ
ٱلنَّاسَ وَلَا يَذْكُرُونَ ٱللَّهَ إِلَّا قَلِيلًا ﴿١٤٢﴾

142. munaafiqiintu waxay dhagri Eebe (isku dayi) isna wuu dhagri (oo abaal Marin) markay u istaagaan Salaaddana way istaagaan iyagoo wahsan, oo is tusi Dadka Mana xusaan Eebe wax yar mooyee.

مُّذَبْذَبِينَ بَيْنَ ذَٰلِكَ لَآ إِلَىٰ هَٰٓؤُلَآءِ وَلَآ إِلَىٰ هَٰٓؤُلَآءِ ۚ
وَمَن يُضْلِلِ ٱللَّهُ فَلَن تَجِدَ لَهُۥ سَبِيلًا ﴿١٤٣﴾

143. waxayna ku noqnoqon (wareeri) arrintaas dhexdeeda kuwaasina lama jiraan kuwaana lama jiraan, cidduu dhumiyey Eebe uma heshid Waddo (cid hanuunin).

144. kuwa (Xaqa) rumeeyow ha ka yeelanina Gaalada sokeeye Mu'miniinta ka sokow, Ma waxaad doonaysaan inaad isugu yeeshaan Eebe korkiinna xujo cad (inuu idin ciqaabo).

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تَتَّخِذُواْ ٱلۡكَٰفِرِينَ
أَوۡلِيَآءَ مِن دُونِ ٱلۡمُؤۡمِنِينَۚ أَتُرِيدُونَ
أَن تَجۡعَلُواْ لِلَّهِ عَلَيۡكُمۡ سُلۡطَٰنٗا مُّبِينًا ١٤٤

145. munaafiqiintu waxay ku sugnaan dabaqa hoose ee Naarta umanaheshid gargaare.

إِنَّ ٱلۡمُنَٰفِقِينَ فِي ٱلدَّرۡكِ ٱلۡأَسۡفَلِ مِنَ ٱلنَّارِ
وَلَن تَجِدَ لَهُمۡ نَصِيرًا ١٤٥

146. kuwa toobadkeena ee wanaajiya camalka, oo isku dhawra Eebe, oo u kali yeela Diintooda (Cibaadadooda) Eebe kuwaasi waxay la jiri mu'miniinta, wuuna siin doonaa Eebe Mu'miniinta Ajir wayn.

إِلَّا ٱلَّذِينَ تَابُواْ وَأَصۡلَحُواْ وَٱعۡتَصَمُواْ
بِٱللَّهِ وَأَخۡلَصُواْ دِينَهُمۡ لِلَّهِ فَأُوْلَٰٓئِكَ مَعَ
ٱلۡمُؤۡمِنِينَۖ وَسَوۡفَ يُؤۡتِ ٱللَّهُ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ
أَجۡرًا عَظِيمٗا ١٤٦

147. muxuu ku fali Eebe cadaabkiinna haddaad mahdisaan ood rumeysaan, Eebana waa mahdiye Waana Oge.

مَّا يَفۡعَلُ ٱللَّهُ بِعَذَابِكُمۡ إِن شَكَرۡتُمۡ
وَءَامَنتُمۡۚ وَكَانَ ٱللَّهُ شَاكِرًا عَلِيمٗا ١٤٧

**Munaafiqiintu waa kuwa Muslimiinta la suga balaayo, hadday guul helaanna yidhaahda waan idin la jiray, hadday Gaaladu wax gaadhaanna dhaha anagaa idin guulaynay, kuwaase Eebaa kala xukumi iyaga iyo Mu'miniinta, Eebana uguma yeelo Jid iyo Xujo Mu'miniinta korkeeda, munaafiqiintu waa kuwa Salaaddu ku culustahay Dadkana is tus tusiya, oon meella haysan.**
**Tan kale waa inaan gaalo sokeeye ga dhigan Mu'miniinta intii la gudbo si aan ciqaab Eebe u imaan, munaafiq abaalkiisna waa dabaqa hoose ee Naarta, ciddiise Toobad keenta oo xaqa raacda Eebana dhab ahaan u caabuda waxba Eebe cadaabkeeda iyo Ciqaabteeda ku falimaayo, wuuna ku mahdin.**
**Waxaana sugnaatay (Camalka Eebe u kali yeel wax yarbaa kugu fillaane) waxayna ku tusin naxariista Eebe iyo inuusan rabin Ciqaabta Addoomadiisa hadday toosnaadaan. An-Nisaa' (141-147).**

---

148. Ma Jecla Eebe in lala Qayliyo Xumaan oo Hadal ah Ruux la Dulmiyey Mooyee, Eebana waa Maqle Og.

۞لَّا يُحِبُّ ٱللَّهُ ٱلۡجَهۡرَ بِٱلسُّوٓءِ مِنَ ٱلۡقَوۡلِ إِلَّا
مَن ظُلِمَۚ وَكَانَ ٱللَّهُ سَمِيعًا عَلِيمًا ١٤٨

149. Haddaad Muujisaan Khayr ama Qarisaan ama Cafidaan Xumaan Eebana waa Dhaafe kara.

إِن تُبۡدُواْ خَيۡرًا أَوۡ تُخۡفُوهُ أَوۡ تَعۡفُواْ عَن سُوٓءٖ
فَإِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَفُوّٗا قَدِيرًا ١٤٩

150. Kuwa ka Gaalooba Eebe iyo Rasuulkiisa oo dooni inay kala (Bixiyaan) Eebe iyo Rasuulkiisa oo odhan waxaannu Rumayn Qaar waana Diidi Qaar oo dooni inay ka yeeshaan Arrintaa dhexdeeda Waddo.

إِنَّ ٱلَّذِينَ يَكۡفُرُونَ بِٱللَّهِ وَرُسُلِهِۦ
وَيُرِيدُونَ أَن يُفَرِّقُواْ بَيۡنَ ٱللَّهِ وَرُسُلِهِۦ
وَيَقُولُونَ نُؤۡمِنُ بِبَعۡضٖ وَنَكۡفُرُ بِبَعۡضٖ
وَيُرِيدُونَ أَن يَتَّخِذُواْ بَيۡنَ ذَٰلِكَ سَبِيلًا ١٥٠

151. Kuwaasi iyaga umbaa Gaalo dhab ah, waxaana u darbannay Gaalada Cadaab wax Dulleeya.

أُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْكَٰفِرُونَ حَقًّاۚ وَأَعْتَدْنَا لِلْكَٰفِرِينَ
عَذَابًا مُّهِينًا ﴿١٥١﴾

152. Kuwa rumeeyey Eebe iyo Rasuulkiisa oon kala bixinin Cid ka mid ah kuwaas wuu Siindoonaa (Eebe) Ajirkooda, Eebana waa Dhaafe Naxariista.

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ بِٱللَّهِ وَرُسُلِهِۦ وَلَمْ يُفَرِّقُواْ بَيْنَ
أَحَدٍ مِّنْهُمْ أُوْلَٰٓئِكَ سَوْفَ يُؤْتِيهِمْ أُجُورَهُمْۗ
وَكَانَ ٱللَّهُ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿١٥٢﴾

153. Waxay ku warsan Ehelu Kitaabku Inaad kaga soo Dejiso Kitaab Xagga Samada, Dhabahaan yey u warsadeen (Nabi) Muuse wax ka wayn kaas waxayna dheheen noo tusi Eebe si Cad waxaana qabatay qaylo (daran) Dulmigooda dartiis, waxayna yeesheen Dibi intay u Timid Xujooyin, waana ka Cafinay Arrintaas, waxaana siinay Nabi muuse Xujo Cad.

يَسْـَٔلُكَ أَهْلُ ٱلْكِتَٰبِ أَن تُنَزِّلَ عَلَيْهِمْ كِتَٰبًا
مِّنَ ٱلسَّمَآءِۚ فَقَدْ سَأَلُواْ مُوسَىٰٓ أَكْبَرَ مِن ذَٰلِكَ
فَقَالُوٓاْ أَرِنَا ٱللَّهَ جَهْرَةً فَأَخَذَتْهُمُ ٱلصَّٰعِقَةُ
بِظُلْمِهِمْۚ ثُمَّ ٱتَّخَذُواْ ٱلْعِجْلَ مِنۢ بَعْدِ مَا جَآءَتْهُمُ
ٱلْبَيِّنَٰتُ فَعَفَوْنَا عَن ذَٰلِكَۚ وَءَاتَيْنَا
مُوسَىٰ سُلْطَٰنًا مُّبِينًا ﴿١٥٣﴾

**Ma habboona in Xumaan iyo Hadal dhib ah lala Qaylyo, Ciddiise la dulmiyo waxaa u banaan inuu aarsado. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Ma jecla Eebe in ruuxna ruux Habaaro Haddaan la dulmiyin. Eebana wax walba waa ogyahay, Ciddii kala saarta Eebe iyo Rasuuladiisa kuwaasu waa Gaalo dhab ah Gaalana waxaa loo darbay Cadaab daran, Mu'miniintuse waxay mudan Janno illeen ma kala saarin Xaqee.**
**Tan kale ma haboona sidii Yuhuuddii Nabiga si madax adayg ah wax u warsan jiray illeen Caaday u tahaye waxayna warsadeen Nabi Muuse wax ka wayn, waana in laga fogaado Jidkooda. An-Nisaa' (148-153).**

---

154. Waxaan koryeellay (Buurta) Dhuur Ballankoodii dartiis waxaana ku nidhi ka gala Irridda idinkoo Sujuudsan, waxaana ku nidhi ha ku xadgudbina Sabtida waxaana ka qaadnay Ballan adag.

وَرَفَعْنَا فَوْقَهُمُ ٱلطُّورَ بِمِيثَٰقِهِمْ وَقُلْنَا لَهُمُ ٱدْخُلُواْ
ٱلْبَابَ سُجَّدًا وَقُلْنَا لَهُمْ لَا تَعْدُواْ فِى ٱلسَّبْتِ
وَأَخَذْنَا مِنْهُم مِّيثَٰقًا غَلِيظًا ﴿١٥٤﴾

155. (Waan Lacnadnay) Burintooda Ballankooda iyo ka Gaalowgooda Aayaadka Eebe iyo u Dilidda Nabiyada Xaqdarro iyo Hadalkooda Quluubtanadu way daboolantahay, saas ma aha ee waxaa Daabacay (daboolay) Eebe Gaalnimadooda darteed mana rumeeyaan wax yar mooyee.

فَبِمَا نَقْضِهِم مِّيثَٰقَهُمْ وَكُفْرِهِم بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ
وَقَتْلِهِمُ ٱلْأَنۢبِيَآءَ بِغَيْرِ حَقٍّ وَقَوْلِهِمْ قُلُوبُنَا غُلْفٌۢۚ
بَلْ طَبَعَ ٱللَّهُ عَلَيْهَا بِكُفْرِهِمْ فَلَا يُؤْمِنُونَ
إِلَّا قَلِيلًا ﴿١٥٥﴾

156. iyo Gaalnimadooda darteed iyo Hadalkooda Maryama oy ku Been abuurteen si wayn.

وَبِكُفْرِهِمْ وَقَوْلِهِمْ عَلَىٰ مَرْيَمَ بُهْتَٰنًا عَظِيمًا ﴿١٥٦﴾

157. iyo Hadalkoodii ahaa anagaa Dillay Masiix Ciise Ibnu Maryam Rasuulkii Eebe ahaa mayna Dilin mana Wadhin laakiin waa loo Shabahay, (ekeysiiyey), kuwii isku Khilaafay Ciise waxay kaga suganyihiin Shaki, wax Cilmi ahna uma leh oon ahayn Raacid Male umana dilin dhab.

وَقَوْلِهِمْ إِنَّا قَتَلْنَا ٱلْمَسِيحَ عِيسَى ٱبْنَ مَرْيَمَ رَسُولَ
ٱللَّهِ وَمَا قَتَلُوهُ وَمَا صَلَبُوهُ وَلَٰكِن شُبِّهَ لَهُمْ ۚ وَإِنَّ
ٱلَّذِينَ ٱخْتَلَفُوا۟ فِيهِ لَفِى شَكٍّ مِّنْهُ ۚ مَا لَهُم بِهِۦ مِنْ عِلْمٍ
إِلَّا ٱتِّبَاعَ ٱلظَّنِّ ۚ وَمَا قَتَلُوهُ يَقِينًۢا ﴿١٥٧﴾

158. Saas ma aha ee waxaa u koryeelay Xaggiisa Eebe, ilaahayna waa Adkaade Falsan.

بَل رَّفَعَهُ ٱللَّهُ إِلَيْهِ ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ عَزِيزًا حَكِيمًا ﴿١٥٨﴾

159. Ehelu Kitaab kasta wuu rumeyn Ciise Geeridiisa ka hor, Maalinta Qiyaamana wuxuu ku noqon korkooda Markhaati.

وَإِن مِّنْ أَهْلِ ٱلْكِتَٰبِ إِلَّا لَيُؤْمِنَنَّ بِهِۦ قَبْلَ
مَوْتِهِۦ ۖ وَيَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ يَكُونُ عَلَيْهِمْ شَهِيدًا ﴿١٥٩﴾

Waxaa kor kooda layeelay Buurta Dhuur waxaana la faray inay Hogaansamaan oo Sujuudaan lagana reebay inay Xad gudbaan, hase yeeshee markay Buriyeen Ballankii, oy ka Gaaloobeen Aayaadka Eebe oy laayeen Nabiyadii ooy Sheegeen inay Quluubtoodu Daboolantahay iyo Xumaantay ku Sheegeen Maryam iyo inay Dileen Nabi Ciise iyagoon Dilin Eebaase u « Moodsiiyey » shabahay Korna yeelay waxyaalahaas iyo wax la mid ah yaa Eebe u Ciqaabay una Lacnaday, una Dulleeyey illeen Xaqay diideene. Qisada Nabi Ciise iyo Hooyadiina waa in loo Rumeeyo sida ku Cad Quraanka oo ah inuu yahay Addoon Eebe oo Nabi ah ee san wax Cibaada ah Mudan, waana doqonnimo in wax Eebe ka soo hadhay la Caabudo. An-Nisaa' (154-159).

---

160. Dulmi kuwii Yuhuudoobay dartiis yaan uga Reebnay korkooda Wanaaga loo xalaaleeyey iyo ka Celintooda Jidka Eebe wax badan.

فَبِظُلْمٍ مِّنَ ٱلَّذِينَ هَادُوا۟ حَرَّمْنَا عَلَيْهِمْ طَيِّبَٰتٍ
أُحِلَّتْ لَهُمْ وَبِصَدِّهِمْ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ كَثِيرًا ﴿١٦٠﴾

161. Iyo Qaadashadooda Ribada iyagoo laga Reebay Xaggeeda iyo ku Cunidda Xoolaha Dadka si Baadil ah, waxaana u darbanay Gaalada ka mid ah Cadaab Daran.

وَأَخْذِهِمُ ٱلرِّبَوٰا۟ وَقَدْ نُهُوا۟ عَنْهُ وَأَكْلِهِمْ أَمْوَٰلَ ٱلنَّاسِ
بِٱلْبَٰطِلِ ۚ وَأَعْتَدْنَا لِلْكَٰفِرِينَ مِنْهُمْ
عَذَابًا أَلِيمًا ﴿١٦١﴾

162. Laakiin kuwa ku xeeldheer Cilmiga oo ka mid ah iyo Mu'miniintu waxay rumeyn waxa lagugu Dejiyay, iyo wixii la Dejiyey hortaa, iyo kuwa Oogo Salaadda ee Bixiya Zakada ee rumeeya Eebe iyo Maalintii Dambe kuwaas waxaan siinaynaa Ajir wayn.

لَّٰكِنِ ٱلرَّٰسِخُونَ فِى ٱلْعِلْمِ مِنْهُمْ وَٱلْمُؤْمِنُونَ
يُؤْمِنُونَ بِمَآ أُنزِلَ إِلَيْكَ وَمَآ أُنزِلَ مِن قَبْلِكَ ۚ
وَٱلْمُقِيمِينَ ٱلصَّلَوٰةَ ۚ وَٱلْمُؤْتُونَ ٱلزَّكَوٰةَ
وَٱلْمُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ أُو۟لَٰٓئِكَ سَنُؤْتِيهِمْ
أَجْرًا عَظِيمًا ﴿١٦٢﴾

163. Annagaa kuu waxyoonnay sidaan ugu waxyoonay (Nabi) Nuux iyo Nabiyadii ka dambeeyey waxaana u waxyoonay Nabi Ibraahim, Ismaaciil, Isxaaq, Yacquub (Awlaad) Faracii, Ciise, Ayuub, Yuunus, Haaruun, Sulaymaan, waxaana siinay Daawuudna Zabuur.

إِنَّآ أَوۡحَيۡنَآ إِلَيۡكَ كَمَآ أَوۡحَيۡنَآ إِلَىٰ نُوحٖ
وَٱلنَّبِيِّـۧنَ مِنۢ بَعۡدِهِۦۚ وَأَوۡحَيۡنَآ إِلَىٰٓ إِبۡرَٰهِيمَ
وَإِسۡمَٰعِيلَ وَإِسۡحَٰقَ وَيَعۡقُوبَ وَٱلۡأَسۡبَاطِ
وَعِيسَىٰ وَأَيُّوبَ وَيُونُسَ وَهَٰرُونَ وَسُلَيۡمَٰنَۚ
وَءَاتَيۡنَا دَاوُۥدَ زَبُورٗا ١٦٣

164. iyo Rasuullo aan kaaga Qisoonay horay iyo Rasuullo aanaan kaaga qisoon, wuuna la Hadlay Eebe Nabi Muuse Hadal.

وَرُسُلٗا قَدۡ قَصَصۡنَٰهُمۡ عَلَيۡكَ مِن قَبۡلُ وَرُسُلٗا
لَّمۡ نَقۡصُصۡهُمۡ عَلَيۡكَۚ وَكَلَّمَ ٱللَّهُ مُوسَىٰ
تَكۡلِيمٗا ١٦٤

165. Waa Rasuullo Bishaarayn oo Digi si ayan Dadka Xujo ugu yeelan Eebe ka dib Rasuullada, Eebana waa Adkaade Falsan.

رُّسُلٗا مُّبَشِّرِينَ وَمُنذِرِينَ لِئَلَّا يَكُونَ لِلنَّاسِ
عَلَى ٱللَّهِ حُجَّةُۢ بَعۡدَ ٱلرُّسُلِۚ وَكَانَ ٱللَّهُ عَزِيزًا
حَكِيمٗا ١٦٥

Dulmigii Yuhuudda yaa looga Xarrimay waxyaalo u Xalaal ahaa iyo Jidka Xaqa ah ooy ka leexiyaan Dadka,, iyo Cunidda Xaq darro ee Xoolaha Dadka.
Kuwa Cilmiga leh ee Xaqa rumeeya oo ka mida iyo kuwa Rumeeya Xaqa oo Salaadda iyo Zakada Guta waxay Mudan Ajriwayn. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu ka mid yahay Nabiyada Eebe u waxyooday Eebana wuxuu u waxyooday Nabiyo Badan Qaar uu ka Qisooday iyo Qaar kalaba, waxaase Waajib ah in Guud ahaan loo rumeeyo inta la Sheegayna Gaar ahaan Xaqana la raaco. An-Nisaa' (160-165).

---

166. Laakiin Eebaa Marag Furi wuxuu kugu Dejiyey wuxuuna ku Dejiyey Cilmigiisa, Malaa'igtuna way Marag furi, Eebana ku Filan Marag.

لَّٰكِنِ ٱللَّهُ يَشۡهَدُ بِمَآ أَنزَلَ إِلَيۡكَۖ أَنزَلَهُۥ
بِعِلۡمِهِۦۖ وَٱلۡمَلَٰٓئِكَةُ يَشۡهَدُونَۚ وَكَفَىٰ
بِٱللَّهِ شَهِيدًا ١٦٦

167. Kuwa Gaaloobay oo ka Leexiya Jidka Eebe waay Dhumeen Dhumid Fog.

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ وَصَدُّواْ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ قَدۡ
ضَلُّواْ ضَلَٰلَۢا بَعِيدًا ١٦٧

168. kuwa Gaaloobay ee Dulmi falay ma aha Eebe kii u Dambi dhaafa ama ku Hanuuniya Jid.

169. Jidka Jahannamo mooyee iyagoo ku waari Waligood, Arrintaasna waa u Fududahay Eebe.

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ وَظَلَمُواْ لَمۡ يَكُنِ ٱللَّهُ لِيَغۡفِرَ
لَهُمۡ وَلَا لِيَهۡدِيَهُمۡ طَرِيقًا ١٦٨ إِلَّا طَرِيقَ
جَهَنَّمَ خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدٗاۚ وَكَانَ ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ
يَسِيرٗا ١٦٩

170. Dadow wuxuu idiinla Yimid Rasuulku Xaq Xagga Eebe ee Rumeeya (Xaqa) saasaa idiin khayr roon, haddaad Gaalowdaanna Eebe waxaa u Sugnaaday waxa ku sugan Samaawaadka iyo Dhulka Eebana waa oge falsan.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ قَدۡ جَآءَكُمُ ٱلرَّسُولُ بِٱلۡحَقِّ
مِن رَّبِّكُمۡ فَـَٔامِنُواْ خَيۡرٗا لَّكُمۡۚ وَإِن تَكۡفُرُواْ
فَإِنَّ لِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۚ وَكَانَ ٱللَّهُ
عَلِيمًا حَكِيمٗا ١٧٠

171. Ehelu Kitaabkoow ha ku Xadgudbina Diintiinna hana ku Dhihina Eebe waxaan Xaq ahayn, Masiix Ciise Ibnu Maryam waa uun Rasuulkii Eebe iyo Kalimadiisii uu ku Tuuray Maryama iyo Ruux Xaggiisa ah ee rumeeya Eebe iyo Rasuuladiisa, hana dhihina Saddex (ILaah) reebtooma, saasaa idiin Khayr Roon, Eebe waa uun ILaah Kaliya, waa ka Nasahanyahay in ILmo u sugnaado, waxaa u sugnaaday waxa Samaawaadka iyo DHulka ku sugan, Eebaana ku filan Wakiil.

يَٰٓأَهۡلَ ٱلۡكِتَٰبِ لَا تَغۡلُواْ فِي دِينِكُمۡ
وَلَا تَقُولُواْ عَلَى ٱللَّهِ إِلَّا ٱلۡحَقَّۚ إِنَّمَا ٱلۡمَسِيحُ
عِيسَى ٱبۡنُ مَرۡيَمَ رَسُولُ ٱللَّهِ وَكَلِمَتُهُۥٓ
أَلۡقَىٰهَآ إِلَىٰ مَرۡيَمَ وَرُوحٞ مِّنۡهُۖ فَـَٔامِنُواْ بِٱللَّهِ
وَرُسُلِهِۦۖ وَلَا تَقُولُواْ ثَلَٰثَةٌۚ ٱنتَهُواْ خَيۡرٗا
لَّكُمۡۚ إِنَّمَا ٱللَّهُ إِلَٰهٞ وَٰحِدٞۖ سُبۡحَٰنَهُۥٓ أَن
يَكُونَ لَهُۥ وَلَدٞۘ لَّهُۥ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ
وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِۗ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ وَكِيلٗا ١٧١

Eebaa wax walba Og, Cid Dhuntayna way Khasaartay waxayna la kulmi Ciqaab. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu la yimid Xaq Cad. Mana haboona in nabi Ciise iyo Diinta lagu Xadgudbo, Ciisena waa Addoon Eebe, ILaahay waa Kali Saddex ILaahna ma Jirto oo waa uun Eebe Kaliya, Wehel iyo Caruurna uma baahna. An-Nisaa' (166-171).

---

172. Iskama kibriyo Masiix inuu ahaado Addoon Eebe, Malaa'igta la dhaweeyeyna (iskama kibriso) ruuxii iska kibriya Cibaadadiisa oo iswayneeya wuu u soo kulmin Xaggiisa Dhammaan.

لَّن يَسۡتَنكِفَ ٱلۡمَسِيحُ أَن يَكُونَ عَبۡدٗا
لِّلَّهِ وَلَا ٱلۡمَلَٰٓئِكَةُ ٱلۡمُقَرَّبُونَۚ وَمَن يَسۡتَنكِفۡ
عَنۡ عِبَادَتِهِۦ وَيَسۡتَكۡبِرۡ فَسَيَحۡشُرُهُمۡ
إِلَيۡهِ جَمِيعٗا ١٧٢

173. Kuwa rumeeyey Xaqa oo Camal fiican fala wuxuu u Oofin Ajrigooda wuxuuna u kordhin Fadligiisa, kuwa iska wayneeya oo iskibriya wuxuu Cadaabi Cadaab Daran mana helayaan Eebe ka sokow Wali iyo Gargaare (midna).

فَأَمَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ
فَيُوَفِّيهِمۡ أُجُورَهُمۡ وَيَزِيدُهُم مِّن فَضۡلِهِۦۖ
وَأَمَّا ٱلَّذِينَ ٱسۡتَنكَفُواْ وَٱسۡتَكۡبَرُواْ
فَيُعَذِّبُهُمۡ عَذَابًا أَلِيمٗا وَلَا يَجِدُونَ لَهُم
مِّن دُونِ ٱللَّهِ وَلِيّٗا وَلَا نَصِيرٗا ١٧٣

174. Dadow waxaa idiin yimid Xujo Xagga Eebe ah waxaanan idiin soo Dejinay Nuur Cad.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ قَدْ جَآءَكُم بُرْهَٰنٌ مِّن رَّبِّكُمْ
وَأَنزَلْنَآ إِلَيْكُمْ نُورًا مُّبِينًا ﴿١٧٤﴾

175. Kuwa rumeeyase Eebe oo Qabsaday (isku dhawray) Eebe (iyo Quraanka) wuxuu Galin Naxariis xaggiisa ah iyo Fadli wuxuuna ku Hanuunin Xaggiisa Jid Toosan.

فَأَمَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ بِٱللَّهِ وَٱعْتَصَمُوا۟ بِهِۦ
فَسَيُدْخِلُهُمْ فِى رَحْمَةٍ مِّنْهُ وَفَضْلٍ وَيَهْدِيهِمْ
إِلَيْهِ صِرَٰطًا مُّسْتَقِيمًا ﴿١٧٥﴾

176. Waxbay ku warsan, waxaad dhahdaa Eebaa idiin Fidyoon Kalaalada, hadduu dhinto Ruux aan ILmo lahayn oo leh Walaashiis waxay Mudan Nus wuxuu ka tagay isaguna wuu Dhaxli hadduusan ILmo u sugnaanin, hadday Labo yihiina waxay Mudan Labo Dalool wuxuu ka tagay, hadday yihiin Walaal Rag iyo Haween ah kan Lab waxaa u sugnaaday Labo Dhadig Qaybtood, wuxuu idiin caddayn Eebe (Xaqa) inaydaan Dhumin Eebana wax kasta waa Ogyahay.

يَسْتَفْتُونَكَ قُلِ ٱللَّهُ يُفْتِيكُمْ فِى ٱلْكَلَٰلَةِ
إِنِ ٱمْرُؤٌا۟ هَلَكَ لَيْسَ لَهُۥ وَلَدٌ وَلَهُۥٓ أُخْتٌ فَلَهَا
نِصْفُ مَا تَرَكَ وَهُوَ يَرِثُهَآ إِن لَّمْ يَكُن لَّهَا
وَلَدٌ فَإِن كَانَتَا ٱثْنَتَيْنِ فَلَهُمَا ٱلثُّلُثَانِ مِمَّا تَرَكَ
وَإِن كَانُوٓا۟ إِخْوَةً رِّجَالًا وَنِسَآءً فَلِلذَّكَرِ مِثْلُ
حَظِّ ٱلْأُنثَيَيْنِ يُبَيِّنُ ٱللَّهُ لَكُمْ أَن تَضِلُّوا۟
وَٱللَّهُ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمٌۢ ﴿١٧٦﴾

Ciddii iska kibrisa ama iska waynaysa Cibaadada Eebe wuxuu la kulmi Eebe wuuna Abaal marin, Nabi Ciise iyo Malaa'igta Eebana iskama kibriyaan. Mana haboona in Cidna iska waynayso Cibaadada Eebe. Suuradduna waxay ku Dhamaatay waxay ku Bilaabatay oo ah Dhaxalka si aan loo Dhumin Xaqana looga leexan ee loo Raaco Qaybta Eebe iyo Sharcigiisa Caadilka ah. An-Nisaa' (172-176).

## Suurat Al-Maa'idah سُورَةُ المَائِدَةِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa Ee Naxariis Guud iyo mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Kuwa (Xaqa) Rumeeyoow Oofiya Ballanka, waxaa Laydiin Baneeyey Xoolaha Nicmoolayda waxa laydinku Akhrin Korkiinna Mooyee idinkoon banaysanayn Ugaadhsiga idinkoo xarman Eebana wuxuu Xukumaa wuxuu Doono.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ أَوْفُوا۟ بِٱلْعُقُودِ أُحِلَّتْ
لَكُم بَهِيمَةُ ٱلْأَنْعَٰمِ إِلَّا مَا يُتْلَىٰ عَلَيْكُمْ غَيْرَ مُحِلِّى
ٱلصَّيْدِ وَأَنتُمْ حُرُمٌ إِنَّ ٱللَّهَ يَحْكُمُ مَا يُرِيدُ ﴿١﴾